Ku dhaqan Xafiis D.

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

# OFFICIAL BULLETIN

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 11aad** **MUQDISHO, 31 JANUARY 2024** **Lr.1**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

**FAAFINTA BILAHA SOO BAXAY**

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.
Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

# KOBNIIN

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

**BOGGA SEDDEXAAD**

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

**BILLE**

# JANUARY 2024

# TUSMO


| | |
|---|---|
| **XEER RA'IISUL WASAARE LR. 146** | **Taariikh: 04/01/2024** |
| ***XEERKA: XEER-NIDAAMIYAHA SHARCIGA SOCDAALKA*** | **Bog 1** |
| **XEER RA'IISUL WASAARE LR. 147** | **Taariikh: 04/01/2024** |
| ***XEERKA: XEER NIDAAMIYAHA SHARCIGA HAY'ADDA SOCDAALKA IYO JINSIYADDA SOOMAALIYEED*** | **Bog 46** |

**Tariikh: 04/01/2024**

**Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.146**

**XEERKA: XEER-NIDAAMIYAHA SHARCIGA SOCDAALKA**

XRW - BIXIT
10 JAN 2024
OPM - EXIT

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 99aad farqadaha (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Warqadda summadeedu taha **WC&AD/XAWSH &H /925 / 2023, ee ku Taariikheysan 11/12/2023** kuna saabsan codsi soojeedinta Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Amniga.

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.59..01.24** ee **04/01/2024,** kuna saabsan ansixinta **Xeer-nidaamiyaha sharciga socdaalka**' oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Markuu tixgeliyey:** Muhiimadda uu leeyahay meel-marinta Xeer-nidaamiyaha sharciga socdaalka'

**Wuxuu Meel-mariyey:**

**Qodobka 1aad**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.59.01.24 ee 04/01/2024,** kuna saabsan ansixinta - **Xeer-nidaamiyaha sharciga socdaalka**"oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

## Qodobka 2aad

Waxaa Wasaaradda Amniga Gudaha loo igmaday in ay hir-geliso, meel-marisana Xeer-nidaamiyaha sharciga socdaalka

## Qodobka 3aad

**Xeer-nidaamiyaha sharciga socdaalka'** waxa uu dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN/002/2024
TAARIIKH: 18/1-2024
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**WASAARADDA AMNIGA GUDAHA**

# XEER-NIDAAMIYAHA SHARCIGA SOCDAALKA SOOMAALIYA

***(Sharci Lr. 006 ee Maarso, 2023)***

**2023**

# CUTUBKA KOWAAD QODOBBO GUUD

## Qodobka 1aad

## Magaca Xeer-nidaamiyaha

Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu magacaabaa Xeer-nidaamiyaha Sharciga Socdaalka

Soomaliya, waxaana lagu dhaqan-gelinayaa "Sharciga Socdaalka Soomaliya, Sharci Lr.06 ee Maarso, 2023.

## Qodobka 2aad

## Qeexid

Xeer-nidaamiyahan gudihiisa, haddii aan si kale loogu qeexin, erayada soo socda wuxuu mid walba yeelanayaa macnaha ku hor qoran:

1. **Wasiir**: waxaa loola jeeda Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha ee Xukuumadda JFS;
2. **Wasaarad**: waxaa loola jeedaa Wasaaradda Amniga Gudaha ee Xukuumadda JFS;
3. **Muwaadin**: waxaa loola jeedaa shakhsi kasta oo soomali ah si waafaqsan qodobbada Dastuurka JFS iyo sharciyada kale ee lagu caddeeyo muwaadinnimada iyo jinsiyadda Soomaaliya;
4. **Ajnabi**: waxaa loola jeedaa qof shisheeye ah oo aan ahayn muwaadin Soomaaliyeed;
5. **Ajnabi aan raali laga ahayn**: waxaa loola jeedaa shakhsiga lagu xusay Qodobbada 38aad iyo 39aad ee Sharciga Socdaalka Soomaaliya, sida:

b. qof kasta oo Ajnabi ah oo lagu qabtay ku xad-gudub ka dhan ah sharciga Socdaalka iyo Xeer-nidaamiyahan, isagoo ku sugan dhulka Soomaaliya, isla markaana ay Sarakiisha Socdaalku u gudbiyaan maxkamadda awoodda u leh; iyo

t. ajnabiga aan raali laga ahayn looma oggola inuu ka soo dego berriga, badda, diyaaradda, ama gaadiid kale ee ku sugan dhulka JFS ama lug ku soo gala;

6. **XJFS:** waxaa loola jeedaa Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
7. **JFS**: waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
8. **HSJS:** waxaa loola jeedaa Hay‟adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed;
9. **Hay'adda**: waxaa loola jeedaa Hay‟adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaliyeed ee heer Federaal;
10. **Qaxooti:** waxaa loola jeedaa qof kasta oo ay qaxootinimo u qeexayaan sharciyada dalka iyo Axdiga Caalamiga ah ee Qaramada Midoobay ee Geneva 1951 (UN Geneva Convention 1951);
11. **Agaasime Guud:** waxaa loola jeedaa Agaasimaha Guud ee Hay‟adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaliyeed;
12. **Sarkaal socdaal:** waxaa loola jeedaa hawl-wadeen kasta oo ka tirsan hay‟adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan, Sharciga Hay‟adda iyo Sharciga Socdaalka JFS;
13. **Baasaboor:** waxaa loola jeedaa dokumenti socdaal oo rasmi ah oo si sharci ah dal u sameeyo, dal kalana lagu geli karo loogana bixi

karo, isla markaana la aqoonsan yahay oo oggolaansho dal-ku-gal (entry clearance/visa) la saari karo; iyo

14. **U-qeybsane:** waxaa loola jeedaa sarkaal ka socda Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed oo ka hawl-gala Safaarad ama Qunsuliyad guud ee JFS.

## Qodobka 3aad

## Ujeeddada Xeer-nidaamiyaha

Ujeeddada Xeer-nidaamiyahani waa habsami-u-hirgelinta "Sharciga Socdaalka Soomaaliya" ee ku tilmaaman Qodobka 1aad ee sare, wuxuuna xeer-nidaaminayaa:

1. Soo-gelidda dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
2. Maritaanka (transit) dhulka, badda, iyo garoomada caalamiga ah ee dalka JFS.
3. Ka-baxidda dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS).
4. Joogista iyo degista dalka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya (JFS).
5. Jaan-goynta ciqaabaha dembiyada socdaalka ee ay galaan gaadiidka rakaabka keena ama ka qaada dalka JFS, dadka mas'uulka ka ah iyo rakaabka.
6. Tilmaamaha hagaya Saraakiisha Scdaalka, xakameynta gefafkooda iyo ciqaabta dembiyada ay ku galaan shaqada dhexdeeda iyagoo hareer maraya Sharciga Socdaalka iyo Xeernidaamiyaha habsami loogu hirgeliyo.

## Qodobka 4aad Baaxadda Xeer-nidaamiyaha

1. Xeer-nidaamiyahan waxaa keliya oo lagu maamulayaa hawlaha khuseeya socdaalka ee ay u idman tahay HSJS.
2. Hay‟addu waa mid leh awood sharci-fulineed iyo mid maamul oo ay ku maareyso arrimaha socdaalka iyo bixinta dokumentiyada safarka iyo hubintooda si waafaqsan Xeer- nidaamiyahan, Sharciga Socdaalka Soomaaliya, Sharciga HSJS iyo shuruucda kale ee dhaqan-galka ka ah JFS.

## CUTUBKA LABAAD KAALINTA HAY'ADDA

### Qodobka 5aad

### Higsiga Hay'adda ee Ku Aaddan Xeer-nidaamiyaha

Higsiga Hay‟adda Socdaalka iyo Jinsiyadda ee la xiriira arrimaha socdaalka si waafaqsan Sharciga Hay‟adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed, wuxuu ku qotomaa:

1. Gudashada waajibaadkeeda shaqo si waafaqsan Dastuurka JFS, Sharciga Hay‟adda, Sharciga Socdaalka Soomaaliya iyo Shuruucda kale ee dhaqan-galka ka Dalka JFS.
2. Ilaalinta iyo dhawrista xuquuqda aadanaha marka ay Hay‟addu bixinayso adeegyada ay bulshada u hayso ee la xiriira socdaalka, iyadoo la raacayo hadafka iyo ujeeddadda Xeer- nidaamiyahan, sharciyada kale ee dalka iyo xeerarka caalamiga ah.
3. Waxay Hay‟addu u xilsaaran tahay dhammaan maamulka iyo maareynta arrimaha socdaalka dalka JFS oo ay ka mid yihiin:
   b) meel-marinta iyo dhaqan-gelinta Xeer-nidaamiyahan;
   t) hirgelinta Sharciga Socdaalka iyo Sharciga HSJS;

j) dhaqan-gelinta siyaasadda Socdaalka; iyo

x) xakameynta iyo maareynta xudduudaha ee la xariira dhammaan dadka soo gelaya ama ka baxaya dalka JFS.

4. Hay‟addu waxay u xilsaaran tahay bixinta iyo baabi‟inta dal-ku-galka, joogitaanka kumeel-gaarka ah, dal-ku-joogga rasmiga ah ee la siinayo ajaanibta soo gelaysa ama joogeysa dalka JFS, iyadoo la ilaalinayo Xeer-nidaamiyahan iyo shuruucda kale ee la xiriirta.
5. Musaafurinta ajaanibta aan raaliga laga ahayn iyo xaqiijinta ka-bixitaankooda dalka JFS marka lagu helo ku xad-gudubka Xeer-nidaamiyahan iyo sharciyada la xariira.
6. Soo-saarista, hubinta iyo bixinta dokumentiyada safarka muwaadiniinta Soomaaliyeed meel walba oo ay joogaan.
7. Hay‟addu waxay mas‟uuliyad ka saaran tahay xaqiijinnada aqoonsiyada (identity verifications) oo lagu saleynayo dokumentiyada safarka, sida baasaboorka, warqadda aqoonsiga, dal-ku-galka (visa) iyo dokumentiyada kale ee khuseeya socodsiinta hawlahaas.
8. In lagu sameeyo wareysiyo toos ah ama aan toos ahayn (travelor assessement) dadka safarka ah, rakaabka, cidda mas‟uulka ka ah gaadiidka si loo hubiyo in socdaalkoodu yahay mid sharci ah oo waafaqsan shuruucda u degsan socdaalka dalka JFS, iyo in la xaqiijiyo is-waafaqsanaanta sheegashada ujeeddada safarka iyo macluumaadka la helay.
9. Saraakiisha socdaalku, iyagoo waajibaadkooda shaqo gudanaya, qof kasta oo ay ogaadaan inuu safarkiisu yahay mid aan waafqsanayn sharciga socdaalka dalka, ha ahaado ajnabi ama

muwaadin soo gelaya ama ka baxaya, waxaa lala wadaagayaa isaga iyo xogtiisaba hay‟adaha dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahayn ee kala hawl-gala Hay‟adda bar- xudduudeedyada dalka, iyadoo ahmiyadda kowaad la siinayo sugidda amniga Qaranka, si ay ugu sameeyaan baaritaan dheeri ah ee dhinaca amniga inta aan lagu fulin xad- gudubyada dhinaca socdaalka ee uu galay.

10. Hay‟addu waxay hormuud ka tahay guud ahaan isku-xirka hay‟adaha ka hawl-gala barxudduudeedyada dalka (Inter-agency Border Management Committee „IBMC‟).

**Qodobka 6aad**

**Mas'uuliyadda Oggolaanshaha Dal-ku-galka, Dal-ku-joogga iyo Degista Dalka JFS**

1. HSJS waxay mas‟uul ka tahay bixinta iyo baabi‟inta oggolaanshaha dal-ku-galka, dal- kujoogista iyo degista dalka JFS, iyadoo u hoggaansan tilmaamaha ku qeexan Xeernidaamiyahan, Sharciga Socdaalka iyo hab-raacyada fulineed ee uu soo saaro Agaasimaha Guud si waafaqsan Sharciga HSJS iyo sharciyada kale ee dalka ee dhaqan- galka ah.
2. Safaaradaha JFS ee dalka Dibaddiisa waxay ka qabanayaan codsiyadooda iyo dokumentiyada looga baahan yahay, si dhammeystiran, marka ajaanibtu ay ka dalbadaan oggolaansho dal-ku-gal (entry clearance/visa) ka dibna waxay u soo gudbinayaan HSJS si ay go‟aan uga gaarto codsiyada u qalma in la siiyo oggolaanshaha.

3. HSJS marka ay hesho codsiyada iyo dokumentiyada ka yimid safaaradaha dibadda ee

JFS, Hay‟addu waxay uga jawaabaysaa sida ugu dhaqsiyaha badan. Marka ay gaaraan

codsiyada la oggolaaday, Safaaradu waxay bixinaysaa dal-ku-galka (entry clearanc/visa permit).

4. HSJS waxay soo saaraysaa hab-raac lagu faahfaahinayo Diiwaan-gelinta ajaanibta, Dal- ku-galka, Dal-ku-joogga iyo Degista dalka JFS si waafaqsan Qodobka 56aad (2) ee Sharciga Socdaalka Soomaaliya, Sharci Lr. 006 ee Maarso 2023.

## CUTUBKA SADDEXAAD U-SOCDAALIDDA SOOMAALIYA

### Qodobka 7aad

### Awoodaha iyo Wajibaabka Saraakiisha Socdaalka

1. Xeer-nidaamiyahani wuxuu siinayaa Sarkaalka HSJS awoodo iyo waajibaad la xiriira dhaqan-gelinta Xeer-nidaamiyahan iyo Sharciga Socdaalka, sida maareynta barxudduudeedyada dalka, fududeynta socdaalka Sharciga ah, tarxiilka, baarista, oggolaanshaha ama diidmada ku-soo-gelitaanka iyo uga bixitaanka dalka JFS sifo aan sharci ahayn, iyo guud ahaan maareynta xogta socdaalka.
2. Saraakiisha HSJS waxaa waajibkoodu yahay in ay hayaan diiwaanka maalinlaha ah ee dhammaan dadka soo gelaya ama ka baxaya dalka, iyo dadka loo diiday dal-ku-galka ama laga saaray dalka iyo faahfaahinta sababaha diidmada ama dal-ka-saaridda.

3. Sarkaalka Socdaalka ee HSJS waxaa waajib ku ah ku-dhaqanka iyo fulinta axkaamta ku qeexan Sharciga Socdaalka Soomaaliya, Sharci Lr. 006 ee Maarso, 2023 iyo Xeernidaamiyahan oo labaduba si mug leh u sharaxaya shuruudaha iyo hannaanka ay marayaan socdaaleyaasha/musaafiriinta soo gelaya ama ka baxaya dalka.
4. Sarkaalka HSJS, isagoo raacaya hab-raacyada waafqasan sharciga, wuxuu siinayaa adeeg hufan socdaaleyaasha/musaafiriinta dalka soo gelaya ama ka baxaya, ha ahaadeen muwaadiniin ama ajaanib.
5. Soo-gelitaanka dalka JFS, qofka socdaalka ah waxaa laga hubinayaa:

b. **Muwaadin-**

i) in magaca muwaadinku ku jiro liiska rakaabka (manifest list);

ii) in muwaadinku haysto dokumenti safar oo Soomaali ah ee sax ah (Baasaboor,

Warqadda dal-ku-noqoshada degdegga ah ama

Dhaafiye); iii) halka safarkiisu ka soo bilowday iyo halka uu ku dhammaanayo; iv) in uusan ku jirin liiska dad la baadi-goobayo ama dembiyo loo haysto (wanted list);

v) taariikhda socdaalada uu muwaadinku hore u sameeyey; iyo

vi) caruurta ka yar 18 sano, waxaa lagama-maarmaan ah in waalidkiisu la socdo ama qof haysta awood-siin maxkamadeed.

t. **Ajnabi-**

i) in magaca ajnabiga socdaalka ah laga helo liiska rakaabka (manifest list);

ii) in dokumtiga safarkiisu yahay mid sax ah, isla markaana ay dhicitaankiisa ka dhiman tahay ugu yaraan 6 (lix) bilood;

iii) in uusan ajnabigu ku jirin liiska dad la baadi-goobayo ama dembiyo loo haysto (wanted list); iv) in uu haysto dal-ku-gal ama oggolaansho sax ah;

v) in uu soo buuxiyey foomka caddeynta soo-gelidda; vi) in uu haysto dammaanad buuxda ee marti-geliye soo buuxiyey shuruudaha dammaanadda ee ku xusan Qodobka 23aad ee Xeer-nidaamiyahan iyo habraaca diiwaan-gelinta, dal-ku-galka iyo dal-ku-joogga ajaanibta;

vii) in sarkaalka socdaalku hubiyo taariikhda socdaalada uu hore u sameeyey; viii) in Baasaboorka uu ku safrayo la geliyo habka socdaalka dalka (border database);

ix) in sarkaalka socdaalku ka qaado ajnabiga faraha iyo sawirka si sax ah; iyo

x) haddii sarkaalka socdaalka ee kowaad (1aad) ay ku adkaato go'aan-ka-gaarista xaaladda ajnabiga, wuxuu u gudbinayaa Kormeeraha Barta oo isaguna la kaashanaya Madaxa Laanta, Agaasimaha Waaxda ilaa Agaasimaha Guud, hadba sida loogu baahdo.

6. Markuu ka gudbo shuruudaha sare ku xusan, isla markaana uu helo dal-ku-gal qofka ajnabiga ah, wuxuu fasax u yahay in uu dalka soo galo.

7. Ajnabiga ka gudbi-waaya shuruudaha kor ku xusan, isla markaana madaxa qeybtu ku filnaan-waayo ayna ula muuqato in uu jiro dembi culus, waxaa loo gudbinayaa Booliska si baaris dheeri ah loogu sameeyo, go"aanna looga gaaro.
8. Qofka asal ahaan Soomaali ah balse wata dhalasho/baasaboor Ajnabi ah waxaa la siinayaa dal-ku-gal 3 (saddex) bilood ah, wixii intaas ka dambeeya haddii uu dalka joogana wax khidmad ah oo ku socda ma jirto.

## Qodobka 8aad

## Dembiyada Ay Geystaan Saraakiisha Socdaalka

1. Sarkaal kasta oo ku kaca arrimihan soo socda, isagoo ku gudo-jira shaqadiisa, wuxuu gelayaa fal-dembiyeed ay ka dhalanayso ciqaab, si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan, Sharciga HSJ, Sharciga Socdaalka iyo sharciyada kale ee dalka:

b) fududeyn safar sharci-darro ah;

t) qof amar xayiraadeed ka yaal oo si ku-talo-gal ah loo siidaayo;

j) fal-dembiyeed dhacay oo la qariyo ama wax aan dembi ahayn oo dembi laga dhigo si loo handado dadka safarka ah;

x) qarin xogta qof baxaya ama soo galay dalka iyadoo la gees-marinayo sharciga; kh) adeeg-bixin ku saleysan anshax-xumo baahsan oo lid ku ah Sharciga;

d) maxsuul kasta ee musuq-maasuq oo ka dhasha fal sarkaalku fuliyey; iyo

r) ku kicitaan musuq-maasuq, isdaba-marin ama anshax-xumo lid ku ah Xeer- nidaamiyahan, Sharciga HSJS, Sharciga

Socdaalka, sharciyada kale ee dalka iyo dhammaan hab-raacyada iyo siyaasadaha gaarka ah ee Hay‟adda.

2. Waxaa lagu qaadayaa ciqaabta ku xusan Qodobka 53^aad ee Sharciga Socdaalka, iyo Qodobka 245^aad ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed (Somali Penal Code), iyo qodobbadii sharci ee kale oo munaasib ku ah, kuwaasoo ay dabaqayaan Maxkamadaha awoodda u leh.
3. Si guud, Sarkaal kasta waxaa waajib ku ah inuu aqoon u leeyahay laguna tababaro shuruucda socdaalka, kana dhawrsanaado ku xad-gudubka ama dembiyada kale ee ku cad Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed (XCS) iyo sharciyada kale ee dalka, inta uu ku gudo-jiro gudashada waajibkiisa hay‟adda ee loo idmaday,

## Qodobka 9^aad Awoodaha Saraakiisha Socdaalka

1. Waxay awood u leeyihiin in ajnabiga imaanaya JFS ay u oggolaadaan ama u diidaan galitaanka dalka iyagoo meel-marinaya Sharciga Socdaalka Soomaaliya iyo Xeernidaamiyahan.
2. Haddii ay dhacdo diidmo, sarkaalka socdaalku waa in uu diiwan-geliyaa sababaha diidmada, isla markaana uu keydiyaa si loo tixraaci karo mustaqbalka.
3. Waxay leeyihiin awood ay ku joojin karaan, baari karaan, kuna xiri karaan warqadda sooqabashada la‟aanteed (without warrant) qofkii ay ku tuhmaan in uu ku xad-gudbay Sharciga Socdaalka, Xeer-nidaaniyahan iyo sharciyada kale ee dalka. Balse, qofkii lagu xiro amar la‟aan (without warrant) waa in loo gudbiyo sharciga iyo maxkamadda awoodda u leh, muddo aan ka badnayn 48 (afartan

iyo sideed) saac, sida ku cad Qodobka 39aad ee Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed (XHCS).

4. Musaafirinta ajaanibta aan la doonayn ama qof kasta oo ku xad-gudba Sharciga Socdaalka iyo Xeer-nidaamiyahan.
5. In ay wareysi ka qaadaan, hubiyana dokumentiyada dadka safarka ah oo doonaya in ay soo galaan ama ka baxayaan JFS.
6. Waxay awood u leeyihiin in ay galaan, baaraan, xannibaan gaadiid kasta, sida diyaarad, markab ama baabuur oo ku sugan gudaha Soomaaliya ama soo gelaya haddii loo hayo sababo muujinaya ku xad-gudubka Sharciga Socdaalka iyo Xeer-nidaamiyahan oo habsami loogu dhagan-gelinayo.
7. Inay dib ugu celin karaan gaadiidkii keena qof aan Sharci u haysan soo-gelitaanka dalka.
8. Inay ka qaadaan wareysi qofka magan-gelyo-doonka ah, kuna siiyaan rukhsad dal-ku-joog ku-meel-gaar ah inta dacwadiisa laga go‟aan-gaarayo, waxayna la wadaagayaan xogtiisa Hay‟adda Qaxootiga Qaranka.
9. Awood ay ku siiyaan soo-gelitaanka ku-meel-gaarka ah shaqaalaha maraakiibta/doomaha, diyaaradaha iyo baabuurta soo gala xuduudda JFS.
10. Waxay awood u leeyihiin in ay ilaaliyaan in shaqaalaha la socda diyaaradaha (crew) aysan dalka Soomaaliya soo geli karin Baasaboor iyo aqoonsi (Crew ID card) la‟aan, aysana joogi karin muddo ka badan toddobo (7) maalmood, wixii intaas dhaafsiisan waxaa ku soconaya ganaax maalinle ah, sida ku cad Qodobka 54aad (4) ee Sharciga Socdaalka Soomaaliya.

11. Qofka shaqaalaha diyaaradaha ah (crew) ee dalka jooga muddo dhan 1 (hal) bil si sharcidarro ah, wuxuu muteysanayaa ganaax, musaarifin iyo in uusan dalka dib ugu soo laaban karin ilaa muddo 2 (labo) sano ah.

## Qodobka 10aad

## Waajibnimada Hortegista Sarakiisha Socdaalka

1. Socdaale/musaafir kasta oo soo gelaya ama ka baxaya dhulka JFS waxaa waajib ku ah hortegista Saraakiisha Socdaalka.
2. Qofka safarka ah markuu hor-yimaado Saraakiisha Socdaalka waa inay hubiyaan is- waafaqsanaanta dokumentiyadiisa iyo jawaabaha uu bixiyey.
3. Qof kasta oo soo gala dalka JFS, kana soo gala goob aysan joogin Hay‟adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed, waxaa waajib ku ah in uu iska xaadiriyo saldhigga booliska ee ugu dhow si ay ugu gudbiyaan xafiiska ugu dhow ee Hay‟adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed muddo 24 (afar iyo labaatan) saac gudahood.
4. Haddii uusan qofka ajnabiga ahi ku hortegi-waaya xafiiska HSJS muddada loo cayimay, wuxuu mudanayaa ciqaabta ama ganaaxa ku xusan Qodobka 54aad ee Sharciga Socdaalka ka hor inta aan laga musaafurin dalka JFS.
5. Qof kasta oo hortegi-waaya xafiisyada hay‟adda waxaa la qiimeynayaa ujeeddadii uu dalka u soo galay si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan iyo Sharciga Socdaalka.
6. Marka lagu caddeeyo qof musaafur ah, ha ahaado muwaadin ama Ajnabi, in uu aflagaado u geystay saraakiisha socdaalka ama uu si

qayaxan ugu dhawaaqo erayo meel-ka-dhac ku ah karaamada iyo sharafta Qaranka, waxaa lagu qaadayaa Qodobka 268aad ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed (XCS), iyadoo qofka ajnabiga ah loo raacinayo fulinta Qodobka 239aad ee isla Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed (XCS).

## CUTUBKA AFARAAD SHURUUDAHA SOO- GELISTA, JOOGISTA IYO DEGISTA DALKA JFS

### Qodobka 11aad

### Bar-xuduudeedyada iyo Shuruudaha Soo-gelista Dalka JFS

1. Asteynta bar-xduuudeedyada dalka laga soo galo ama looga baxo waxaa lagu soo saarayaa laguna faahfaahinayaa Xeer-nidaamiye iyo Hab-raac gaar ah oo ay soo saarto HSJS, lagana ansixiyo Golaha Wasiirrada Xukuumadda JFS.
2. Bar-xudduudeedyada ku tibaaxan Faqradda (1) ee Qodobkan waxay noqonayaan barxuduudeedyada rasmiga ah ee laga soo galo ama looga baxo dalka JFS.
3. In la hubiyo in dhammaan rakaabka imaanaya ama baxaya ay si sax ah oo dhammeystiran u buuxiyaan foomka bixitaanka iyo gelitaanka ayna saxiixaan.
4. Shuruucda lagu dhaqayo bar-xuduudeedyada dhulka way ka duwanaan doonaan booqashooyinka gaaban ee ay isugu gudbaan bulshooyinka xuduudaha wada degan, iyadoo Hay‟addu ka soo

saari doonta Xeer-nidamiye iyo Hab-raacyo u gaar ah degaan kasta.

5. Bulshooyinka ku dhaqan bar-xuduudeedyada baahidooda isku gudubka joogtada ee maalinlaha ah, waxaa lagu diiwaan-gelinayaa Warqadda Booqashada Gaaban (Day Pass) oo ay ku xusan tahay xogta shakhsiga, ujeeddada booqashada, waqtiga uu xuduudda ka gudbay iyo waqtiga soo-noqoshada, waxaana soo saaraya Hay‟adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed (HSJS).
6. In Saraakiisha Socdaalku ka helaan magaca qofka doonaya in uu soo galo JFS warqadda ama bayaanka rakaabka (passenger manifest).
7. In saraakiisha Socdaalku ka baaraan qof walba oo safar ah liiska digniinta ((alert list).
8. Sida ku cad sharciga waxaa laga doonayaa Rakaabka imaanaya ee soo gelaya Soomaaliya in ay ku buuxiyaan xogtooda oo dhammeystiran Foomka Rakaabka ee yaala barxuduudeedyada ee ah ilaha ama irdaha laga soo galo dalka.
9. Ajnabiga waxaa loo oggolaanayaa in uu soo galo ama ka baxo dalka JFS, haddii uu haysto:
   b). baasaboor sax ah oo ugu yaraan waqtigiisa dhicitaanka ay ka dhiman tahay muddo aan ka yarayn 6 (lix) bilood ama dokumenti kale oo safar oo sharci ah oo muujinaya in uu leeyahay qofka sitaha ah; iyo
   t). oggolaasho dal-ku-gal sax ah oo lagu soo galo ama looga baxo dalka JFS si waafaqsan sharciga.

**Qodobka 12aad**

**Shuruudaha Oggolaanshaha Soo-gelitaanka iyo Joogitaanka Dalka JFS**

1. Si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan iyo Sharciga Socdaalka Soomaaliya, waxaa soo geli kara ama joogi kara dalka JFS qof kasta oo ajnabi ah, haddii uu haysto mid ka mid ah oggolaanshaha soo socda, si waafaqsan Sharciga Socdaalka Soomaaliya, Sharci Lr. 006 ee Maarso, 2023:

   b). oggolaansho dal-ku-gal dalxiis;

   t). oggolaansho maritaan dal;

   j). oggolansho dal-ku-gal waxbarasho ama cilmi-baaris;

   x). oggolaansho dal-ku-gal sabab gaar ah;

   kh). oggolaansho joogitaan muddeysan;

   d). oggolaansho dal-ku-gal soo-noqnoqod leh;

   r). oggolaansho deganaasho rasmi ah;

   s). oggolaansho dal-ku-gal caafimaad; sh. oggolaansho dal-ku-gal ganacsi; ama dh. oggolaansho dal-ku-gal shaqo.

2. Oggolaanshaha lagu xusay Faqradda (1) ee Qodobkan, waxaa lagu bixinayaa dalab ka yimaada codsadaha, waxaana bixinaya Sarkaalka Socdaalka ee awoodda u leh, si waafaqsan Qodobka 7[aad] ee Sharciga Socdaalka Soomaaliya, Sharci Lr. 006 ee Maarso, 2023, waxaana lagu soo saarayaa shaabbad ama dhejis (sticker) ay ku caddahay nooca oggolaanshaha oo sidoo kale lagu muujinayo dokumentiga safarka ee codsadaha.

3. Ajnabiga soo gala dalka wuxuu ku joogi karaa Oggolaansho waafaqsan kii uu ku soo galay dalka, qofka ajnabiga ah ee doonaya inuu bedelo oggolaanshihiisii hore waa inuu dalka ka baxaa ka dibna ku soo galo oggolaansho waafaqsan dalabkiisa dambe.

## Qodobka 13aad Oggolaansho Dal-ku-gal Dalxiis

1. Waxaa la siin karaa oggolaasho dalxiis ajnibiga doonaya in uu dhulka Soomaaliya u yimaado:
   b). ujeeddooyin dalxiis; ama
   t). sabab kasta oo leh dabeecad muddeysan taasoo ula muuqata Hay‟adda mid u qalanta in lagu siiyo oggolaansho soo-gelid dalxiis.
2. Oggolaanshaha bixinta dalxiis waxaa shuruud looga dhigayaa haysashada tikit (ticket) laabasho ama mid muujinaya in qofku uu dal kale u sii gudbayo iyo dammaanad ballanqaadaysa kharashaadka inta lagu gudo-jiro muddada joogitaanka dalka JFS ee codsaduhu weydiistay.
3. Muddada joogidda kama dheeraan karto 3 (saddex) bil oo ka billaabanaysa taariikhda soogelidda, iyadoo wixii intaa ka badan qofka laga rabo codsi muddo-kordhin.
4. Waxaa oggolaanshaha cusub la kordhin karaa hal mar oo aan ka badnayn 3 (saddex) bilood, iyadoo la tixgelinayo codsiga qofka doonaya inuu dheeraysto muddada oggolaanshaha dalxiiska.

## Qodobka 14aad

## Oggolaansho Dal-ku-gal Maritaanka Dalka

1. Waxaa la siin karaa Oggolaansho maritaanka dalka (transit) qof ajnabi ah haddii:
   b). ujeeddada uu Soomaaliya u yimid ay tahay in uu uga sii gudbo meel kale oo uu u socdo, taasoo ka baxsan dalka JFS, iyo
   t). uu wato dokumentiga saxda ah ee looga baahan yahay si uu ku galo dalka uu uga sii gudbayo JFS.
2. Shuruudda bixinta oggolaanshaha maritaanka dalka waa haysashada Tikit (Ticket) sax ah oo muujinaya dalka uu qofku u sii gudbayo ama qaab saxan oo uu safarkaas ku sii wadan karo iyo haysashada kharash dabooli kara baahida qofka ajnabiga ah muddada uu joogayo dalka.
3. Dal-ku-galka Maritaanka ahi wuxuu qofka safarka ah xaq u siinayaa inuu soo galo dalka kuna sugnaado JFS waqti aan ka badnayn muddada ku cayiman Qodobka 14aad (3) ee Sharciga Socdaalka Soomaaliya, muddadaasi waxay ka bilaabanaysaa taariikhda uu soo galay dalka.

## Qodobka 15aad

### Oggolaanshaha Dal-ku-gal Waxbarasho, Cilmi-baaris ama Caafimaad

1. Oggolaanshaha Dal-ku-gal Waxbarasho iyo Cilmi-baaris waxaa la siin karaa haddii:
   b. ajnabigu doonayo inuu u yimaado dalka JFS waxbarasho ama cilmi-baaris, iyadoo ujeeddadiisu tahay in uu ku

qaato tababarro ama ku biiro hay'ado waxbarasho, haddii ay hay'adahaasi yihiin kuwo ay aqoonsan tahay Wasaaradda Waxbarashada ee Xukuumadda JFS;

t. oggolaansho waxbarasho waxay ku xirnaan kartaa bixinta aqbalaadda hay"adda waxbarashada, haysashada dammaanad ku salaysan ujeeddada uu ajnabigu u imaanayo iyo xaqiijinta in qofka shisheeyaha ahi haysto awood dhaqaale oo muujinaysa in uu isku filnaan karo inta uu ku sugan yahay dalka JFS; iyo

j. oggolaanshaha dal-ku-gal waxbarasho ama cilmi-baaris waxay u suurtogelinaysaa ajnabiga in uu soo galo dalka JFS, wuxuuna joogi karaa muddada uu waxbarashada ama cilmi-baarista wado.

2. Oggolaanshaha Dal-ku-gal Caafimaad waxaa la siin karaa haddii:

b. ajnabiga doonaya inuu u yimaado dalka JFS sabab caafimaad;

t. ajnabigu uu buuxiyo shuruudaha ku xiran oggolaanshahan;

j. ajnabigu haysto dokumenti dhaqtar uu ku caddeynayo xaaladiisa caafimaad;

x. ajnabigu haysto warqad casuumad ah oo uu qoray dhaqtar ka diiwaan-gashan

Wasaaradda Caafimaadka, Xukuumadda JFS; kh. ajnabigu haysto kharashaad ku filan muddada uu ku sugan yahay dalka JFS; iyo d. oggolaanshaha caafimaad waxaa la kordhin karaa halkii marba ugu badnaan 3 (saddex) bilood,

iyadoo inta jeer ee la kordhinayo ay ku xiran tahay muddada dhaqtarkiisu ku taliyo in ay u baahan tahay daweyntiisu.

## Qodobka 16aad Oggolaansho Dal-ku-gal Sabab Gaar ah

1. Waxaa la siin karaa oggolaansho u-imaatin sabab gaar ah shakhsiyaadka ay casuumtay Dawladda Soomaaliya ee ku imaanaya booqasho rasmi ah ama mid aan rasmi ahayn ama ka-qeyb-gal shirar labo-geesood ah ama dhinacyo badan ay qeyb ka yihiin iyadoo lala tashanayo Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Xukuumadda JFS.
2. Oggolaanshaha imaatinka sababaha gaarka ah waxaa loo marayaa hab-maamuus munaasab ku ah dadka imaanaya oo ay diyaarisay Wasaaradda Arrimaha Dibaddda ee

   Xukuumadda JFS ama hay‟adda uu khuseeyo, ka dib marka lagu wargeliyo Agaasimaha Guud ee HSJS.

## Qodobka 17aad

## Oggolaansho Dal-ku-gal Soo-Noqnoqod leh

1. Waxaa la siin karaa ajnabi kasta oo dhulka JFS ku yimid si Sharci ah, ka dib markuu codsado in la siiyo oggolaansho soo noqnoqosho leh, iyadoo HSJS ay go‟aan ka gaarayso xaq-uyeelashadiisa oggolaanshadaas.
2. Waxaa sidoo kale, la siin karaa ajnabiga soo buuxiya shuruudaha ku cad Faqradda (5) ee Qodobka 11aad ee Sharciga Socdaalka Soomaaliya.

3. Codsadaha waxaa looga baahan yahay in uu ku muujiyo dalabkiisa dammaanad sharci ah, cinwaanka lagala xiriiri karo, qofka damiinanaya iyo meesha uu ku soo degayo.
4. Codsaduhu waa in uu caddeeyo sababta uu u qaadanayo oggolaanshaha soo-noqnoqod leh oo faahfaahsan, ka dib marka lagu qanco codsigiisa iyo sababaha uu sheegtay ayaa la siinayaa.
5. Ajnabiga ku soo gala dalka oggolaanshaha ee uu ku gaabto waqtiga waxaa loogu dari karaa ilaa muddo 1 (hal) bil ah, balse kuma soo noqon karo muddadaas loo kordhiyey haddii uu ka baxo dalka.

## Qodobka 18aad

## Oggolaansho Joogitaan Muddeysan

1. Waxaa la siin karaa Ajnabi kasta oggolaansho joogitaan muddeysan, marka laga reebo ajnabiga aan raaliga laga ahayn haddii uu la yimaado arrimaha soo socda:

b). markuu wato mid ka mid ah oggolaanshaha muddada leh ee ku xusan Qodobka 12aad

(1) ee Sharciga Socdaalka; ama

t). haddii uu dammaanad kala yimaado qofka daneynaya ama qof kale, isla markaana sarkaalka Hay‟addu uu ku qanco dammaanadaas;

2. Agaasimaha Guud ee Hay‟adda Socdaalka iyo Jinsiyadda wuxuu ka khafiifin karaa ama ka dhaafi karaa qofka Ajnabiga ah ee codsanaya oggolaansho deganaansho joogitaan muddeysan shuruudaha ku xusan faqradda 1aad (b) ee Qodobkan, haddii ay jirto sabab maangal ah, ka dib marka ay caddaato in ajnabigu haysto

qaab kale oo uu ku dabooli karo baahidiisa inta uu ku gudo-jiro joogitaanka loo oggolaaday ee dalka, sidoo kalena dabooli karo kharashka tikit-ka laabashada ama ay jiraan sababo muujinaya in uu u sii wadanayo safarkiisa dal kale.

3. Waa in ay si cad u tilmaamanaataa muddada oggolaanshaha joogitaan kasta (temporary residence) oo qof ajnabi ah uu joogayo dalka. Haddii uusan qofkaas ajnabiga ahi haysan oggolaansho waafaqsan Sharciga Socdaalka iyo Xeer-nidaamiyihiisa kama qeyb-geli karo hawlo faa"iido laga helayo ee laga fuliyo dalka gudahiisa.
4. Oggolaanshaha muddada joogitaanka muddeysan (temporary permit) kama badnaan karto 1 (hal) sano.
5. Qof kasta oo haysta oggolaanshaha joogitaanka muddeysan wuxuu u hoggaansamayaa shuruudaha ku cad oggolaanshaha la siiyey.

### Qodobka 19aad Oggolaansho Deganaansho Rasmi ah

1. Waxaa la siin karaa oggolaansho deganaansho rasmi ah Ajnabiga leh sumcad wanaagsan, isla markaana codsada, ka dib markuu Soomaaliya ku joogay si sharci ah, muddo aan ka yarayn 5 (shan ) sano oo xiriir ah.
2. Sida ku cad faqradda 1aad ee isla qodobkan, waxaa lagu dhaqayaa ku-tiirsaneyaasha sida lamaanihiisa iyo carruurta ka yar 18 (sideed iyo toban) sano ee la nool qofka ajnabiga ah ee la siiyey oggolaanshaha deganaanshaha rasmiga ah.

3. Haddii qofka la siiyey deganaanshaha rasmiga ah uu ka maqnaado dalka Soomaaliya muddo ka badan 6 (lix) bilood oo xiriir ah, wuu ka dhacayaa oggolaanshaha la siiyey.

### Qodobka 20aad Oggolaansho Ganacsi

1. Waxaa la siin karaa oggolaansho Ajnabiga doonaya in uu ganacsi ama maal-gashi ka sameeyo dalka JFS, waxaane lagu hawl-gelin karaa shuruudaha soo socda:
   b). in ajnabigu uu ganacsi ku darsado saami maaliyadeed ama raasumaal ama in uu si madax-bannaan u sameysto maal-gashi; iyo
   t). in qofka ajnabiga ah uu ballan-qaado in uu u hoggaansamayo shuruucda dalka sida Sharciga Maal-gashiga Shisheeye, Sharci Lr.13 ee 21/01/2016.
2. Qofka ajnabiga ah ee haysta oggolaanshahan wuu ka ganacsan karaa dalka JFS, waana loo shaqeyn karaa isagoo dhawraya Sharciga shaqaalaha shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo shuruucda kale ee dalka ee xiriirka la leh arrimaha ganacsiga iyo shaqaalaha.

### Qodobka 21aad Oggolaansho Dal-ku-gal Shaqo

1. Waxaa la siinayaa oggolaansho ajnabiga ku imaanaya shaqo dalka JFS, markuu oggolaasho shaqo ku helo si waafaqsan Sharciga Shaqo-qorista Shaqaalaha Shisheeye, Sharci Lr.10 ee 09/12/2015.
2. Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, Xukuumadda JFS waxay tixgelinaysaa oggolaanshaha shaqo ee uu soo dalbaday qof

ajnabi ah, in ay tahay shaqada uu ruux muwaadin Soomaali ah uu qaban karo iyo in kale.

3. Waxaa reebban in shaqo uu qaban karo muwaadin Soomaaliyeed loo qoro qof ajnabi ah, marka laga reebo jiritaanka heshiis labo dhinacle ama heer gobol ah oo dhaqan-gal ah oo meesha ka saarayo faquuq shaqaale isla markaasna siinaya fursado siman muwaadiniinta dhinacyada, waxaana hubinaya fulinta faqraddan Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada oo kaashanaysa Hay‟adda Socdaalka iyo Jinsiyadda.
4. Iyadoo la fiirinayo danta guud ee bulshada, Agaasimaha Guud ee Hay‟adda Socdaalka iyo Jinsiyadda wuxuu diidi karaa oggolaanshaha dal-ku-galka ee ajnabi kasta oo doonaya in uu ku yimaado heshiis khilaafsan faqradda (3) ee sare.
5. Wasaaradda Shaqada & Arrimaha Bulshada iyo dhammaan Hay‟adaha kale ee Dawladda, shirkadaha ama ganacsiyada gaarka loo leeyahay ee ay khuseyso shaqada uu qabanayo qofka shisheeyaha ah waxaa xil ka saaran yahay la-socodka shaqada uu qabanayo qofksaas ajnabiga ah.
6. Hay‟adda uu qofka ajnabiga ah u shaqeynayo, waxay caddeynaysaa; iyo

   b. nooca adeegga shaqo ee uu qofka ajnabiga ahi qabanayo; iyo

   t. muddada uu sharci ahaan oggolaansho u haysto.

## Qodobka 22aad

## Waajibaadka Saaran Qofka Ajnabigu u Shaqeynayo

1. In uu siiyo qofka ajnabiga ah shaqadii loo oggolaaday in uu qabto iyadoo la tixgelinayo nooca oggolaanshaha shaqada.
2. In uu keeno marka laga dalbado qofka ajnabiga ah, aqoonsigiisa, macluumaadka iyo nuqullada heshiiska shaqada ajnabiga shaqaalaha ah.
3. In uu ogeysiiyo Hay‟adda Socdaalka iyo Jinsiyadda iyo Hay‟adaha kale ee ay khuseyso marka qofka ajnabiga ah ay shaqadu ka dhammaato ama uu qabanayo shaqo ka duwan mihnadii loo dalbaday.
4. Marka shaqada uu dalka ka hayey qofka ajnabiga ah ay joogsato, sababta ay doonto ha noqotee, loo-shaqeeyaha waxaa looga baahan yahay in uu ogeysiiyo Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada iyo Hay‟adda Socdaalka iyo Jinsiyadda muddo 15 (shan iyo toban) maalmood gudahood ah oo ka billaabanaysa taariikhda ay shaqadu ka dhammaatay ama laga saaray shaqada.
5. Hannaanka diiwaan-gelinta shirkadaha iyo ajaaniibta u shaqeysa waxaa lagu soo saarayaa

   Hab-raac ku salaysan hawlaha maalinlaha ah si waafaqsan Sharciga Socdaalka iyo Xeernidaamiyan.

**Qodobka 23aad**

**Dammaanad**

1. Dammaanadda uu tilmaamayo qodobkan, waxaa bixin kara loo-shaqeeyaha doonaya in uu qofka ajnabiga ah siiyo shaqo uu ka qabanayo gudaha dalka JFS.
2. Waxaa laga doonayaa Loo-shaqeeyaha ama muwaadinka doonayo in uu keeno qof ajnabi ah, in uu la soo wadaago Hay‟adda

Socdaalka iyo jinsiyadda macluumaadka qofka ajnabiga ah ka hor inta uusan keenin sida:

b). rukhsada shaqo ee shirkaddiisa ama aqoonsigiisa oo dhammeystiran;

t). Dammaanadda oo qoraal ah oo ay ku caddahay sababta uu u imaanayo, taariikhda uu imaanayo iyo muddada uu joogayo; iyo

j). nuqul documentiga safarka ajnabiga, telefoonkiisa iyo email-kiisa.

3. Xilliga kordhinta dal-ku-galka ee billowga rukhsadda shaqada, loo-shaqeeyaha waxaa laga dhigayaa "Rahan cadad maaliyadeed ama qoraal ku waajibinaya, waxaana lagu jaangooynayaa kharashka safarka ee ku celin kara qofka ajnabiga ah dalkiisii, haddii is- bedel ku yimaado ku-talo-galkii qorshihii shaqada". Rahanta lacageed waxay dhammeystir u tahay dammaanadii qoraalka ahayd ee uu hore u sameeyey in uu mas‟uul ka yahay qofka ajnabiga ah, waxaana lagu darayaa galka (file) uga furan xafiiska diiwaan-galinta shirkadaha.
4. Muddada shaqadu socoto dhexdeeda, si aan culays ku ahayn qofka ajnabiga ah, looshaqeeyuhu wuxuu si tartiib ah uga jari karaa mushaarkiisa rahantii hore looga dhigay magaciisa, is-af-garadka labada dhinac ee fulinta hawshaan waa in lagu wargeliyo Xafiiska Diiwaan-gelitna Rahanta iyo Dammaanadaha.

## Qodobka 24aad Cusbooneysiinta Dammaanadda

1. Marka joogitaan la siiyey qof ajnabi ah la cusbooneysiinayo, dammaanadda ku xiran iyo muddadii iyo cadadkii lacageed ee ay

xaddiday Hay‟addu ee ku cad Qodobka 23aad ee Sharciga Socdaalka, markale ayaa dib loo cusbooneysiinayaa, waxaana cusbooneysiinaya la-dammaanad-qaadaha wakiilkiisa.

2. Haddii qofka loo-shaqeeyaha ah iyo qofka ajnabiga ah ku heshiiyaan shaqo ka bedelan middii hore iyo waqti ka dheer muddadii hore, iyadoo la tixgelinayo xaaladda is-bedelka, Hay‟addu waxay dalban kartaa caddeymo iyo wax-ka-bedel dammaanadii hore, waxaana lagu salaynayaa nooca iyo muddada shaqada cusub ee ay isku af-garteen ajnabiga iyo wakiilkiisa.

**Qodobka 25aad Baabi'inta Dammaanadda**

1. Haddii qof ajnabi ah oo la siiyey joogitaan dammaanad leh dalka JFS, ka dibna la siiyo deganaansho joogto ah, dammaanaddii magaciisa lagu bixiyey way baaba‟aysaa.
2. Haddii qofka ajnabiga ah oo la siiyey joogitaan ku xiran dammaanad shuruud leh oo uu si kama-dambays ah uga baxo dhulka JFS, isla markaana uu la yimaado kharashkii uu ku bixi lahaa ee ku-noqoshada dalkiisa, waxaa la baabi‟inayaa dammaanaddii hore loogu sameeyey, iyo wixii curaar ah ee ku xirnaa joogitaankiisa, marka ay isku waafaqaan hay‟addii ama qofkii uu dammaanadiisa dalka ku joogay.
3. Qofka ajnabiga ah oo dalka ku yimid shaqo dammaanad leh, kama qaban karo dalka shaqo kale inta ay jirto muddadii dammaanadii hore loogu keenay. Haddii uu raali ka yahay qofka dammaanaddiisa uu dalka ku joogay in loo soo gaabiyo muddadii

joogitaankiisa waa la baabi"inayaa joogitaankii iyo dammaanadii hore, dalka ayuuna ka baxayaa.

4. Haddii uu u wareego qofka ajnabiga ah shaqo kale iyadoo uu jiro heshiiskii hore, shaqadiina uu ka tago, qofka ajnabiga ah waxaa laga qaadayaa wixii kharash ah ee wakiilkiisa uga baxay joogitaankiisa iyo keenistiisa, markaas ka dib waxaa la baabi"inayaa dammaanadii, waxaana dalka looga saarayaa si dhammeystiran.
5. Qofka ajnabiga ah markuu iska gudo wixii kharashaad ah, dalkana ka baxo, wuu ku imaan karaa shaqo kale.

## Qodobka 26aad

### Wax-ka-bedelka iyo Kala-noqoshada Rukhsadda Joogitaanka Dalka

1. Agaasimaha Guud Hay"adda Socdaalka iyo Jinsiyadda isagoo wargelinayaa Wasiirka Amniga Gudaha, wuxuu awoodaa in uu wax-ka-bedel ama kala-noqod ku sameeyo oggolaansho kasta oo lagu soo saaray si waafaqsan Sharciga Socdaalka iyo

   Xeernidaamiyahan, isagoo qaab qoraal ah ku muujinaya go"aankiisa, marka ay yimaadaan xaaladaha soo socda:

   b. haddii qofka haysta oggolaanshaha ama wakiilkiisa uu bixiyey macluumaad khaldan, markii codsiga oggolaanshaha la soo gudbiyey ama oggolaanshaha lagu helay matalaad been ah, xog si ula-kac ah looga tegay ama la qariyo xog muhim ah;

   t. haddii qofka haysta oggolaanshaha uu ku guul-darreysto in uu dhawro mid ka mid ah shuruudaha ku cad oggolaansha ama

qofka haysta oggolaansha uu ku lug yeeshay shaqo aan ahayn shaqadii lagu siiyey oggolaanshaha, isagoo aan haysan fasaxa Hay'adda ama kan Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada; ama

j. haddii uu ka tago ogaal la‟aanta wakiilkiisa shaqadii uu dalka ku yimid

2. Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha wuxuu markasta baabi‟in karaa oggolaansho soogelid ama midda degaan ee la siiyey qof shisheeye ah, si waafaqsan Sharciga Socdaalka iyo Xeernidaamiyahan, isagoo faraya Hay'adda, caddeynayana sababta keentay in la baabi'iyo oggolaanshaha qofka ajnabiga ah si loogu daro keydinta xogta shakhsiga.

3. Haddii oggolaansho joogitaan lagala noqdo qofkii la siiyey, waxaa la soo saarayaa wargelin ku saabsan kala-noqoshadaas, si waafaqsan sharciga iyo Xeer-nidaamiyahan, wuxuuna noqonayaa sida soo socota:

b. in shakhsi ahaan lagu wargeliyo go'aanka kala-noqoshada qofkii haystay oggolaanshaha; iyo

t. sababaha kala-noqoshada keenay, taariikhda kala-noqoshadu ay dhaqan-gelayso iyo waqtiga kama-dambaysta ah ee ka-bixitaankiisa dalka.

4. Haddii qofka ajnabiga ah ay ka dhammaato muddadii oggolaanshaha, waa in uu dalka ka baxaa markuu dhiibo lacagta ay keentay muddadii uu dhacsanaa oggolaanshuhu, si waafaqsan Qodobka 25aad ee Sharciga Socdaalka Soomaaliya.

5. Ajnabiga lagala noqday oggolaansho aan dhicin waxaa la siinayaa muddo ugu yaraan 7 (todobo) maalmood ah ugu badnaanna 3 (saddex) bilood, waxayna ku xiran tahay sababta keentay kala-noqoshada oggolaanshaha.
6. Qofka Ajnabiga ah waxaa kale oo lagala noqon karaa oggolaanshaha joogintaanka dalka JFS markuu ku dhaco xukun maxkamadeed ee ciqaab ah, isla markaana ay muuqato in dembiga lagu helay yahay mid aan ku haboonayn in uu sii joogo dalka uuna dhammeysto muddadii xukunka.

## Qodobka 27aad

### Khidmadda Oggolaanshaha Soo-gelista, Joogitaanka iyo Degista Dalka JFS

1. Bixinta iyo cusbooneysiinta oggolaanshaha ku cad faqradaha kala duwan ee Qodobka 12aad ee Sharciga Socdaalka Soomaaliya, Sharci Lr.006 ee Maarso 2023 iyo Xeer- nidaamiyahan waxay ku xiran yihiin bixinta khidmadaha (tariff) lagu jaan-gooyo Xeer gaar ah oo ay soo wada saaraan Wasiirrada Wasaaradaha Amniga Gudaha iyo Maaliyadda.
2. Xeerka lagu jaan-gooynayo khidmadaha oggolaanshaha ee laga bixiyo Safaaradaha dibadda, Ganaaxyada dadka iyo Gaadiidka ee ku qeexan Sharciga Socdaalka iyo

   Xeernidaamiyahan waxaa soo jeedinaya Hay‟adda Socdaalka iyo Jinsiyadda oo mas‟uul ka ah adeegyadda Socdaal iyo dokumentiyada safar ee laga bixiyo Safaaraddaha Dibadda, iyadoo ka talo-gelinaysa Wasaaradda Maaliyadda, waana in ay ka

fariistaan iskuna raacaan Wasiiradda Wasaaradaha Amniga Gudaha iyo Maaliyadda, waxaana ansixinaya Golaha Wasiirradda ee Xukuumadda JFS..

3. Bixinta iyo cusbooneysiinta oggolaanshaha ay qeexayaan Sharciga Socdaalka iyo Xeernidaamiyehani waxaa shardi u ah in qofka loo soo saarayo oggolaanshaha uu bixiyo khidmadda ku waajibtay ee ku xaddeysan nooca iyo oggolaanshaha la siinayo.

## Qodobka 28[aad]

### Ka-dhaafidda Khidmadaha Oggolaanshaha Dadka Leh Mudnaanta iyo Xasaanadaha La Xiriira Heshiisyada Caalamiga ah

Qodobbada Sharciga iyo Xeer-nidaamiyihiisa saameyn kuma yeelanayaan Heshiisiisyada Caalamiga ah oo ay qeyb ka tahay JFS, kuwaasoo la xiriira ka-dhaafiddda khidmadaha oggolaanshaha leh mudnaanta, sharafta iyo xasaanadda gaarka ah ee Dawladaha Soomaaliya aqoonsan tahay, sida:

b). ajnabiga u yimaada dalka hawl diblomaasiyadeed markuu ku soo galo sifo sharci ah, islamarkaana ay oggolaatay Wasaaradda Arrimaha Dibadda JFS;

t). ajnabiga ku yimaad dalab iyo heshiis ay la gashay mid ka mid hay‟addaha Dawladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo u idmatay qabashada shaqo muhiim u ah dalka; iyo

j). shaqaalaha rasmiga ah ee Qaramada Midoobay (UN) ee haysta dokumentiga safar ee Qaramada Midoobay.

## CUTUBKA SHANAAD HABKA LOO RAACAYO DADKA SAARAN GAADIIDKA BADDA, DIYAARADAHA IYO BAABUURTA SOO GELAYSA AMA KA BAXAYSA DALKA JFS

### Qodobka 29aad

### Waajibaadka Bixinta Liiska Rakaabka (Manifest List) Iyo Ganaaxyada Ka Dhasha

1. Dhammaan gaadiidka badda, diyaaradaha iyo baabuurta soo gelaya ama ka baxaya barxudeedyada JFS waxaa waajib ku ah in ay si hor-maris ula wadaagaan Sarkaalka

   Socdaalka nuqul liiska rakaabka oo uu saxiixay mas‟uul awood u leh ka hor muddo 1 (hal) saac ah imaanshaha gaadiidka dalka JFS.

2. Nuqulka Liiska Rakaabka ee uu saxiixay mas‟uulka awoodda u leh wuxuu caddeynayaa arrimaha soo socda: b). magacyada rakaabka;

   t). xubnaha shaqaalaha; iyo

   j). haddii ay jiraan dad kale oo saaran gaadiidka oo loo kala saaray darajooyinkooda shaqo, isla markaana uu bixiyo wixii macluumaad ah ee laga codsaday.

3. Ka-baaqsashada bixinta Liiska Rakaabka (manifest list) waqtiga ku habboon ee Gaadiidka waxaa ka dhalanaya:

   b. **diyaaradaha**- Ganaax lacageed oo dhan US$2,000 (labo kun Doolarka Maraykanka) ama lacag shillin Soomaali u dhigma;

   t. **gaadiidka badda**- Ganaax lacageed oo dhan US$1,500 (kun shan boqol Doolarka

Maraykan) ama Shillin Soomaali u dhigma; iyo

j. **gaadiidka dhulka**- Ganaac lacageed oo dhan US$1,000 (kun Dollarka Maraykanka).

4. Waxayaabaha ka dhalan kara haddii aan la helin liiska rakaabka gadiidka saaran ama lagu helo khaladaad ama dad dheeraad ah oo gaadiidka saaran: b. waxaa la hakin karaa gaadiidkaas socodkiisa;

t. marka qofka ajnabiga ah uusan oggaalansho ku imaan, isagoo uusan ka warqabin mas"uulka gaadiidka ama ka war hayo waxaa lagu ganaaxayaa gaadiidka lacag dhan US$5,000 -10,000 (shan kun ilaa toban kun Doolarka Maraykanka) ama Shillin Soomaali u dhigma, iyo in uu dib u celiyo ajnabigii uu sharci-darradda ku keenay dalka JFS; iyo

j. qofka ajnabiga ah ee ku sii nagaada dalka isagoo aan haysan oggolaansho waxaa lagu dalacayaa ganaax ku waajibay inta uu dalka ku sugnaa kaasoo ah ganaax dhan US$10 (toban Doolarka Maraykanka) maalintiiba.

5. Tacadiyada ay rakaabka u geystaan maamulka diyaaradaha iyo gabood-fallada ay shirkadaha iyo maamulka diyaaradaha sameeyaan, waxaa ka mid ah: b. in uu ka reebo safar sababo isaga u gaar ah;

t. in uu qof aan safar ku qornayn u fududeeyo in uu raaco diyaraadda ama gadiidka kale;

j. in uu ka reebo qof safar isagoo ku bedelaya qof kale;

x. in uu safarka u oggoaalado qof aan haysan dokumenti safar oo sax ah; kh. in uu rakaabka ballamiyo waqtiga loogu talo-galay

waqti ka badan, taasoo keenaysa dhibaateynta qofka ama sumcad-xumada shaqada sarkaal kasta oo ku hawlan shaqadiisa iyo guud ahaan shaqada Hay‟adda;

d. in uu ku dhaqaaqo musuq-maasuq, is-daba-marin iyo anshax-xumo lid ku ah xeernidaamiyahan, sharciga socdalka iyo sharciyadda kale ee dalka iyo dhammaan habraacyada iyo siyaasadaha gaarka ah ee Hay‟adda; iyo

r. in uu keeno shaqaale diyaaradeed (crew) oo aan sharciga waafaqsanayn.

6. Diyaaraddii lagu helo in ay ku kacday falalka ku xusan Faqradda (5) ee isla Qodobkan waxay mutaysanaysaa ganaax lacageed oo dhan US$2,000 – 3,000 (labo kun ilaa saddex kun Doollarka Maraykanka) ama Lacag Shillin Soomaali u dhigma.

## Qodobka 30aad

## Soo-gelid Ku-meel-gaar ah

Si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan iyo Qodobka 12aad ee Sharciga Socdaalka Soomaaliya, Hawl-wadeennada HSJS waxay awood u leeyihiin bixinta oggolaanshaha, waana in uu noqdaa warqad, shaabbad ama dhejis (sticker) la saaray dokumentiga safarka.

## Qodobka 31aad

**Ciqaabta Uu Mudanayo Milkilaha, Wakiilka Ama Qofka Mas'uulka Ka Ah Gaadiidka Badda, Diyaarad iyo Baabuur**

1. Marka laga reebo muwaadiniinta Soomaaliyeed ee leh maqaam la mid ah socdaalka qofka ajaanibka ah ee hoos ku qoran, kana soo safraya meel uusan ka heli karin adeegga uu u baahan yahay (go home), aysanna joogin safaarad ama qunsuliyad Soomaaliya, dareenkooduna yahay in ay dalkooda dib ugu soo laabtaan, waa in ay shirkaduhu dadkaas ku soo wargeliyaan Waaxda Xuduudaha HSJS ka hor inta aysan u oggolaan in ay gaadiidka soo raacaan.
2. Shisheeyaha ku safraya baasaboor ajnabi oo cimrigiisu yahay wax ka yar 6 (lix) bilood, ma imaan karaan Soomaaliya, gaadiid kasta oo fulin-waaya amarkan waxaa lagu ciqaabayaa sIda uu qabo Qodobka 29aad ee Xeer-nidaamiyahan.

**Qodobka 32aad**

**Maxkamadda Awoodda U Leh Xayiraadda Gaadiidka Badda, Diyaradaha iyo Baabuurta**

1. Gaadiidka keena ajnabi aan raali laga ahayn ama aan rukhsad u haysan soo-gelitaanka dhulka JFS, saraakiisha socdaalku waxay ku fulinayaan ganaaxa uu jaan-goynayo sharciga Socdaalka iyo xeer-nidaamihan.
2. Hay"adda Duulista Hawadu waxay amraysaa in aysan kicin diyaaraddu inta uu milkilaha ama wakiilka gaadiidkaasi ka fulinayo amarka Saraakiisha Socdaalka ee sharcigu tilmaamayo.

3. Haddii ajnabiga aan raaliga laga aheyn uu hore u haystay oggolaansho aan dhicin waxaa dib loogu celinayaa si aan dib-u-dhac lahayn gaadiidkii keenay.
4. Ajnabiga aan raaliga laga ahayn ee soo galo gudaha dalka JFS, maxkamada awoodda u leh waxay go‟aaminaysaa sii-haynta ama xayiraada gadiid kasta ee lagu keenay ajnabigaas, inta laga fulinayo hab-raacyada xeer-nidaamiyahan.
5. Haddii milkilaha ama mas‟uulka gaadiidka ganaax ku dhaco maxkamada waa in ay siihaysaa ama xayirtaa gaadiidka badda, diyaaradaha iyo baabuurta ilaa inta uu ka bixnayo lacagta ganaaxa, tasoo lagu sheegay Xeer-nidaamiyahan, Qodobka 31aad (2).

## CUTUBKA LIXAAD WAAJIBAABKA AJAANIBTA EE DIIWAAN-GELINTA CINWAANNADOODA

### Qodobka 33aad

### Waajibaadka Ajaanibta Ka Saaran Diiwaan-gelinta Cinwaannadooda

1. Waxaa waajib ku ah ajaanibta joogta dalka JFS in ay qoraal ahaan ugu wargeliyaan Saraakiisha Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda halka ay degan yihiin ama wixii is-beddel ah oo ku yimaada cinwaannadooda ay degaan iyo goobta shaqo waqti kasta.
2. Waa mas‟uuliyad saaran loo-shaqeeyaha in uu ku wargeliyo saraakiisha dabo-galka ajaanibta ee Hay‟adda Socdaalka iyo Jinsiyadda nooc kasta oo dhaqdhaqaaq ah ee degaan ama shaqo ee uu sameynayo ajnabiga u shaqeeya.

3. Ka-baaqsashada wargelinta waxaa mas"uuliyadeeda qaadaya loo-shaqeeyaha xataa haddii uusan bixin amarka keenay is-bedelka cinwaanka ajnabiga.

## Qodobka 34aad

## Goobaha Dalka ee Ka Reebban Ajaanibta

1. Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha wuxuu awood u leeyahay, isagoo la tashanaya Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga iyo ciddii kale ee ay khuseyso in uu soo saaro hab- raac koobaya liiska magacyada goobaha JFS ee ka reebban inuu booqdo qof kasta oo ajnabi ah.
2. Fulinta hab-raacan waxaa kaalin weyn ku leh shirkadaha dalxiiska iyo wasaaradda ku shaqada leh waxaana lagu bandhigayaa baraha rasmiga ah ee hagaya dalxiiseyaasha iyo guud ahaan dadka ajaanibta ah.

## Qodobka 35aad

## Shaqo-Ka-Joojinta Qofka Ajnabiga ah

1. Waxaa shaqada looga joojin karaa qofka ajnabiga ah haddii uu ku jiro labadan xaaladood midkood:
   b. in uusan hayn shaqadii uu u qaatay oggalaanshaha; ama
   t. in uu ku lug yeesho shaqo ka duwan middii ku caddeyd oggolaanshaha shaqada.
2. Haddii qof ajnabi ah si lama filaan ah u soo gebengabeeyo shaqadiisa, waa in uu la socodsiiyo Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada iyo Hay"adda Socdaalka iyo Jinsiyadda

Soomaaliyeed muddo 7 (todobo) maalmood gudahood ah oo ka billaabanaysa maalinta ay shaqadu ka dhammaatay qofkaas.

### Qodobka 36aad

### Ku-Ekaanshaha Ajaanibta Shaqada Ay Dalka U Yimaadeen

1. Qof kasta oo ajnabi ah ee dalka loo keenay in uu qabto shaqo cayiman taasoo qof muwaadin Soomaaliyeed ah uusan lahayn aqoonteeda, waxaa ka reebban in uu qabto shaqo kale oo ka duwan middii loo keenay dalka.
2. Waxaa sidoo kale qofka ajnabiga ah ka reebban in uu iskiis u abuurto shaqo si madaxbannaan, sida haddii ay dhacdo in uu ku fakero in uu sameysto shirkad ama wax la mid ah oo uu si madax-bannaan uga hawl-geliyo dalka, waxaa ku waajaib ah haddii uu rabo inuu si iskiis ah shaqo abuurto:
   b. inuu ku wargelinayo joojinta shaqadiisii hore Xafiiska Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada iyo HSJS ugu badnaan 7 (todobo) maalmood gudahood laga billaabo taariikhda shaqadii uu hayey ka joogsaday; iyo
   t. inuu dalka ka baxo kana soo codsado oggolaansho dal-ku-gal dalka dibaddiisa, isagoo raacaya Faqradda (3) ee Qodobkan.

### Qodobka 37aad Ajnabiga Aan Raali Laga Ahayn

1. Haddii ay dhacaan duruufaha soo socda, qofka ajnabiga ah waxaa loo aqoonsan karaa in uu yahay mid aan raali laga ahayn, waxaana

loo diidi karaa in uu dalka soo galo ama waxaa laga musaafurin karaa dalka si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan iyo Sharciyada dlaka:

b. haddii loo keeno amar musaafurin ah oo ka soo baxay Dawladda JFS, laguna soo saaray sida uu qabo Sharciga iyo xeer-nidaamiyehiisa ama sharci kale oo xilligaas dhaqan-gal ah;

t. haddii uusan haysan dhaqaale ku filan noloshiisa muddada uu jooga dalka JFS;

j. haddii uu ku lug yeesho ka-shaqeynta ama daabulidda maan-dooriye ama falal kale oo shuruucda dalku mamnuuceen;

x. haddii uu ku lug yeesho ama looga shakiyo ku lug lahaanshaha tahriibinta dadka ama ka-ganacsiga sharci-darrada ah ee xubanaha bani‟aadamka;

kh. haddii uu ku lug yeesho ama looga shakiyo si mug leh inuu ku lug leeyahay keenista ama ganacsiga hub ama rasaas sharci-darro ah;

d. haddii saraakiisha caafimaadka dawladda ay xaqiijiyaan in qofka shisheeyaha ahi uu qabo cudur halis ku ah nolosha iyo fayo-qabka caafimaadka bulshada;

r. haddii uu dalka JFS ku soo galay si sharci-darro ah, isagoo aan haysan dokumentiyada safarka ee saxda ah ama oggolaansho waafaqsan Sharciga Socdaalka iyo Xeernidaamiyahan;

s. haddii uu yahay codsade hore looga diiday codsigiisa in loo aqoonsado qaxootinimo, iyadoo la eegayo sharciyada dalka iyo Axdiga QM ee Geneva 1951 (UN Geneva

Convention 1951); sh. haddii joogitaanka qofka ama oggolaanshihiisu uu halis ku yahay nidaamka dadweynaha, amniga qaranka, danta-guud, akhlaaqda ummadda ama caqiidada diinta; iyo

dh. haddii uu yahay mid fidinaya mabaadi‟ aan dalka laga oggolayn.

2. Go‟aanka ah in qof shisheeye ah uu yahay mid aan raali laga ahayn waxaa lagu go‟aaminayaa sida ku cad faqradda (1) (b-dh) ee Qodobkan, marka laga reebo dadka dalka looga saaro go‟aannada siyaasadeed.

## Qodobka 38aad

## Waajibaadka Saraakiisha Socdaalka Ee Ku Aadan Ajnabiga Aan Raaliga Laga Ahayn

Saraakiisha Socdaalka ee ka hawl-gala xarumaha kala duwan ee Hay'adda waxaa sharci ahaan ku waajib ah:

b. in ay hakiyaan una gudbiyaan Booliska qof kasta oo ajnabi ah oo aan raali laga ahayn, kaasoo lagu helay inuu ku xad-gudbay Sharciga iyo Xeer-nidaamiyahan, isagoo ku sugan dalka JFS, isla markaasna ay ku wargeliyaan Maxkamadda awoodda u leh, iyadoo la tixgelinayo hab-raacyada Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo Xeerarka kale ee dalka oo xiriirka la leh arrintaas;

t. in ay ka hor-istaagaan ajnabiga aan raali laga ahayn inuu ka soo dego gaadiidka badda, diyaarad, baabuur ama gaadiid kale oo

ku sugan dalka JFS ama lug ku soo galo, haddii uusan ahayn qof qaxootinimo doonaya;

j. in ay dib ugu celiyaan gaadiidkii dalka keenay ajnabiga aan raaliga laga ahayn;

x. in ay u musaafuriyaan ajnabiga aan raaliga laga ahayn dalkii uu u dhashay ama dalkii uu safarkiisa u dambeeyey ka soo billaabay;

kh. qofka ajnabiga ah waa in uu dalka uga baxaa sida ugu dhaqsaha badan oo ah muddo aan ka badnayn 7 (todobo) maalmood, laga billaabo taariikhda lagu wargeliyey, haddii aan Maxkamadi ku xukumin muddo intaas ka duwan; iyo

d. muddada diyaarinta safarkiisa waxaa lagu haynayaa xabsiga ama haddii ay jiraan goobo loo cayimay in lagu hayo dadka sifahaas leh.

## Qodobka 39aad
## Dadka La Musaafurinayo

1. Qofka ajnabiga ah waa laga saaraya dalka, haddii Maxkamadda awoodda u leh ay amarto saaritaankiisa, muddo sharci ah oo cayiman gudaheed.
2. Ajnabiga ay go'aan siyaasadeed Dawladdu ku soo saarto in dalka laga saaro;
3. Ajnabiga ku xad-gudba sharciyadda dalka, waxaa dalka looga saaraayaa goo'aanka Agaasimaha Guud ee Hay‟adda Socdaalka iyo Jinsiyadda, waxaa si qoraal ah lagu gaarsiinayaa qofka ajnabiga ah iyo dhinacayada ay khuseyso go'aanka ka soo baxay Agaasimaha Guud.

4. Go'aanka soo baxay waa in uu wehliyaa amarka saaritaanka oo waqtigiisu cad yahay iyo sidoo kale hab-raaca loo marayo.
5. Qofka ajnabiga ah ee lagu amray inuu ka baxo dalka JFS, waa la sii-haytn karaa haddii sidaas Maxkamadi oggolaado, inta laga dhammeystirayo hawlaha looga saarayo dalka, iyo sidoo kale haddii ay hay'adda ula muuqato in ajnabigaas baxsan karo ama carqalad kale geysan karo inta hawlihisa laga dhammeystirayo.

## Qodobka 40aad

## Dhigista Curaar Si Loo Fuliyo Amarka Musaafurinta

1. Waxaa lagu amri karaa qofka ajnabiga ah ee laga saarayo dalka JFS in uu dhigo lacag curaar ah “deposit” oo ku filan kharashka lagu musaafurinayo ama lagu sii-haytnayo.
2. Si waafaqsan faqradda sare ku xusan ee Xeer-nidaamiyahan, wixii ka soo hara lacagta curaarta ah ee lagu fulinayo ama lagu sii-haytnayo qofka ajnabiga ah, waxaa dib loogu celinayaa isla isaga markuu dhoofayo ama ka gudbayo bar-xuduudeedka dalka JFS.
3. Haddii qofka ajnabiga ah uusan haysan kharash ku filan oo lagu musaafuriyo, waxaa kharashka masaaafurintiisa ku baxaya bixinaya wakiilka qofka ajnabiga ah ee dalka soo geliyey.
4. Muddada laga mamnuncayo waddanka ajnabiga la musaafuriyey in uu dib ugu soo laabto kama yaraan karto muddo 6 (lix) bilood ah, haddii aysan Maxkamadi xaddidin waqti ka duwan.
5. Masafurinta ka dhalata demibiyada la xariira dhinaca socdaalka waxaa fulinaya HSJS iyadoo la raacayo Sharciga Socdaalka ee HSJS iyo sharuucda kale ee dhaqan-galka ah.

## Qodobka 41aad

## Ka-noqoshada Amarka Musaafurinta

Wasiirka Amniga Gudaha ayaa awood u leh ka dhaafo amarka musaafurinta ee ka dhanka ah qofka ajnabiga ah, haddii aysan Maxkamadi xukumin musaafurintiisa si waafaqsan shuruucda dalka, isagoo sababaynaya.

## CUTUBKA TODDOBAAD KA-SOCDAALIDDA DALKA JFS

## Qodobka 42aad
## Dokumentiyada Safarka

Baasaboor ama dokumenti safar waxaa noqon kara sida ay qabaan Xeerka Baasaboorada, Xeernidaamiyahan iyo Sharciga Socdaalka JFS:

b. Baasaboorka caadiga ah (Ordinary passport) kaasoo ku soo baxa codsiga muwaadin Soomaali ah;

t. Basaaboorka shaqaalaha dawladda (service passport) oo ku soo baxa codsi ka yimaada shaqalaaha dawladda oo ay u soo gudbiso hay‟adda uu u shaqeeyo;

j. Baasaboor diblomaasi ah (diplomatic Passport) oo loo soo saaro qof dalka JFS ka haya xil sare sida uu qabo xeer-nidaamiyahan iyo Sharciga Socdaalka Qodobkiisa 42aad (3) sida:

i. Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, xaasaskiisa iyo Caruurtiisa; ii. Madaxweyneyaashii Hore ee JFS, xaasaskooda iyo caruurtooda;

iii. Ra‟iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS, xaasaskiisa iyo caruurtiisa, iyo dhammaan

Ra‟iisul Wasaareyaashii xilka baneeyey; iv. Xubnaha labada aqal ee Barlamaanka Federaalka Soomaaliya, xaasaskooda iyo caruurtooda aan qaan-gaarka ahayn iyo Dhammaan Xildhibaanadii hore;

v. Xubanaha Golaha Wasiirrada;

vi. Guddoomiyaha Maxakamadda Sare; vii. Guddoomiyaha Maxakamadda Dastuurka; viii. Garyaqaanka Guud ee Dawladda;

ix. Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka;

x. Diblomaasiyiinta Wasaaradda Arrimaha Dibadda ka hawl-gala; xi. Jananada (sareeyeyaasha) Ciidamada Qalabka Sida; xii. Madaxweyneyaasha Dawlad-goboleedyada iyo Ku-xigeenadooda; xiii. Guddoomiyeyaasha Baarlamaanada Dawlad-goboleedyada iyo Ku xigeenadooda; iyo

xix. Mas‟uulkii kale ee uu u garto Madaxweynaha JFS.

x. baasaboor, loogu safrayo loogana soo laabanayo dalka;

kh. dokumentiga Safarka Qaxootiga oo loo soo saaro qaxootiga magan-gelyada ka helay

Soomaaliya, si waafaqsan Sharciyada dalka iyo Axdiga QM ee Geneva 1951;

d. Warqadda guryo-noqoshada (go home) oo loo soo saaro muwaadin aan markaas haysan baasaboor saxan laakiin xaq u leh, ayna qasab tahay in uu u soo safro Soomaaliya, iyadoo ay ugu wacan tahay aalad degdeg ah, sida jiro halis ah, tarxiil, geeri ama dibugu-laabasho dal; iyo

r. Buugga bad-maaxa oo lagu soo saarayo dalabka Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda.

## Qodobka 43aad
## Saxnaashaha Baasaboorada iyo Dokumentiyada Safarka

1. Baasaboorka caadiga ah, midka diblomaasiga ah iyo kan shaqadaba waxaa looga gudbi karaa dalalka caalamka dhammaan marka laga reebo dalalka lagu xusay baasaboorka gudihiisa in aan lagu tegi karin.
2. Dokumentiyada safarka degdegga ah waxaa keliya oo ay sii shaqeyn karaan muddo kooban oo lagu xuso dokumentiga safarka degdegga ah ee duruufi keentay laguna tagayo keliya dalka safarka loo yahay.
3. Dokumentiyada safarka ee qaxootiga la siiyo waxaa loogu safri karaa dal kasta marka laga reebo dalka uu ka soo jeedo qofka qaxootiga ah iyadoo la tixgelinayo ammaanka qofkaas.

## Qodobka 44aad

## Safarka Caruurta Ka Yar (18) Sano

Caruurta ka yar 18 (sideed iyo toban) sano, waxaa waajib ah in waalidkiisu la socdo, ama qof awoodaas ay maxkamadi siisay oo xanaano sharci leh.

## Qodobka 45aad

## Xaddeynta Dadka Ku Safraya Baasboorada Dawladda

1. Sarkaalka HSJS wuxuu awood u leeyahay in uu oggolaado dadka uu u oggolaaday Sharcigu Baasaboorada Dawladda in ay ku safri karaan, marka laga reebo Baasaboorka Shaqaalaha Dawladda (Sarvice Passport) oo u baahan in la helo rukhsad safar (Nolo osto).
2. Sarkaalka HSJS waa in uu gutaa waajibaadkiisa isagoo hubinaya dadka ku safraya
   Baasaboorada dawladda in ay waafaqsan yihiin sida ay qabaan Sharciga Socdaalka iyo Xeer-nidaamiyahan, sida:
   b. in qofka ku safraya uu yahay qof dawladda u idmatay shaqo dawladeed oo waafaqsan ujeeddada baasaboorka loo siiyey; iyo
   t. in uu qofka safarkiisu yahay mid fasax ama oggolaansho qoraal ah (permission letter) ka haysto hay"adiisa.
3. Dadka ku safraya baasaboorada Dawladda waxaa lagu faahfaahinayaa sharciga baasaboorka.
4. Shaqaalaha Dawladda waxay ku safri karaan Baasaboorka Shaqada (Service Passport), waxayna xaq u leeyihim marka ay soo laabtaan in ay haystaan inta ay shaqaale Dawladeed yihiin.

## Qodobka 46aad

## Dadka Dib-u-soo-celinta Ku Imaanaya Dalka

1. Marka la hubiyo dadka dib loo soo celinayo muwaadinnimadooda waxa ay kasoo dagan karaan dalka oo dhan.
2. Safaarada Soomaaliya ee ku taal wadanka dadka laga soo celinayo waa in ay hubisaa muwaadinimada dadka la soo celinayo:
   b. qofka aan muwaadin ahayn ee hore u haystay baasaboorka Soomaaliga ah, sababtii ay doonto ha noqoto, waa laga celinayaa; iyo
   t. u-qeybsanaha ka hawl-gala Safaaradu wuxuu ka celinayaa baasaboorka isagoo la wadaagaya xogtaas safiirka si safaaradu ugu wargeliso safaaradda dalka uu u dhashay si ay qeyb uga noqoto caawinaada uu u baahan yahay shakhsigaasi dhammeystirkeeda;
3. Dadka la soo celinayo waa in ay u soo gudbiyaan shirkadaha diyaaradaha warbixintooda HSJS oo ku saabsan tirada iyo xogtooda si loo hubiyo saxnaanshaha dadka la soo celinayo.
4. Shirkadii u hoggaansami-waysa tilmaamaha lagu sheegay qodobkan waxaa lagu fulinaya ciqaabta ku xusan Qodobka 31aad (3) ee Sharciga Socdaalka.

**Qodobka 47aad**

**Ka-dhoofidda Dalka JFS**

1. Qof kasta oo ka dhoofaya dalka JFS wuxuu xaq u leeyahay in uu ka dhoofo baraha rasmiga ah ee laga dhoofo.
2. Shirkadaha diyaaradaha ee ku xad-gudba rakaabka diyaaradda raacaya iyo nidaamkiisa waxay muteysanayaan ganaax iyo ciqaab sida ku cad Faqradda (4) ee Qododbkan.

3. Waxyaabaha xad-gubka oo shirkadda diyaaradu ku muteysan karto ciqaabta waxaa ka mid ah:

b. duullimaadka oo daaha iyadoo aysan jirin sabab la garwaaqsan karo;

t. hubin-la‟aan rakaabka diyaaradda ku qoran taasoo keentay in uu raaco rakaab aan ku jirin liiska (Manifist list) diyaaradda; ama

j. rakaabka ku qoran diyaaradda oo loo reebay sabab la‟aan ama in lagu bedelo qof kale.

4. Dhammaan khaladadkaas waxaa ka dhalanaya ciqaab isugu jirta mag-dhaw, ganaax lacageed ama shaqo-ka-joojin lagu sameeyo diyaaradda iyo hawl-wadeennada ka dib marka la hubsado xil-gudasho-xumada (tort of negligence) ka timid dhinaca shirkadda diyaaradda sida ku cad Qodobka 29aad (5) ee Xeer-nidaamiyahan.

## Qodobka 48aad

## Waxyaabaha Laga Rabo iyo Dokumentiyada Looga Baahan Yahay Qofka Dhoofaya

1. **Muwaadin** waxaa looga baahan yahay:

b. in uu soo qaato warqadda raacidda diyaaradda (boarding pass);

t. in uu wato dokumenti safar oo Soomaali ah (Baasaboor) oo sax ah laguna baxshay sifo sharci ah oo ay dhicistiisa ka dhiman tahay ugu yaraan 6 (lix) bilood;

j. in uu haysto dal-ku-galka wadanka (visa) uu u socdo oo sax ah ama waa in la xaqiijiyo in uu yahay qof u safraya wadan aan dal-ku-gal laga rabin muwaadinka
Soomaaliga ah;

x. in uu haysto tikit (ticket) bixid iyo soo-noqosho

ah (round trip); kh. in laga hubiyo liisaska dadka

lagu raad-joogo ama doonayo;

d. in sarkaalku hubiyo taariikhaha socdaalada muwaadinku hore u sameeyey;

r. in la geliyo habka bixidda (Exit System);

s. in dokumentigiisa la saaro shaabbadda caddeynta bixidda si sax ah; iyo sh. haddii muwaadinku ku safrayo baasaboor dawladeed (Dublomaasi ama Shaqaale), waxaa looga baahan yahay warqadda fasaxa, marka laga reebo Madaxda sare ee JFS.

2. **Ajnabi** waxaa looga baahan yahay:

b. in uu soo qato warqadda raacidda diyaaradda (boarding pass);

t. in uu buuxiyo foomka bixidda;

j. in laga hubiyo in uu haysto dal-ku-gal ama dal-ku-joog Soomaali ah oo aan dhacsanayn;

x. in laga hubiyo liisaska dadka lagu raad-joogo ama la doonayo ama dadka ay hakin safar ka taal;

kh. in uu haysto wax caddeynaya oggolaanshaha dalka uu u socdaalayo (Dal-ku-gal,

Dalku-joog, Degenaansho, Oggolaanshiyo, ama u Dhalasho);

d. in sarkaalku hubiyo taariikhaha socdaalada shakhsigu hore u sameeyey;

r. in la geliyo habka bixidda (Exit System); iyo

s. haddii hawl-qabadka uu sarkaalku ku filnaan-waayo wuxuu u gudbinayaa Kormeeraha Barta oo u sii gudbinaya Madaxa Laanta, haddii uu Kormeeruhu ku filnaan-waayo go‟aan-ka-gaarista arrinka.

## CUTUBKA SIDEEDAAD ILAALINTA, WAAJIBAADKA IYO XUQUUQDA QAXOOTIGA

### Qodobka 49aad
### Shuruudaha Qaxootinimada

1. Maadaama 1962 ay Soomaaliya ka mid noqotay saxiixeyaasha Heshiiska Qaramada Midoobay ee Geneva 1951 (UN Geneva Convention 1951) waxaa waajib ku ah fulinta xuquuqda qaxootiga.
2. Sharciga Qaxootiga Qaranka iyo Heshiiska Qaramada Midoobay ee Geneva 1951 waxay waajibinayaan qof waliba xaq u leeyahay in qaxootinimo loo aqoonsado, haddii uu weydiisto, si loo badbaadiyo noloshiisa iyo bed-qabkiisa, marka la hubsado arrimaha soo socda:
3. Qof kasta oo bani‟aadam ah waxa uu xaq u leeyahay in qaxootinimo loo aqoonsado haddii uu weydiisto sida uu qabo Sharciga Qaxootiga Qaranka iyo Heshiiska Geneva ee 1951, si loo badbaadiyo noloshiisa iyo bad-qabkiisa marka la hubsado arrimaha soo socda:

   b. in uu ka cararay ama dibadda ka joogo dalkiisa cabsi waxyeello awgeed oo salka ku haysa midab, jinsiyad, caqiido diin, feker siyaasadeed ama ka-mid- ahaansho qeyb gaar ah ee bulshada, isla markaana uusan awoodin in uu dib ugu noqodo; ama

   t. in uu jiro weerar dibadda ah, duulaan, la-wareegid shisheeye ama dhacdooyin si xooggan u saameynaya

nidaamka guud ee qeyb ama guud ahaan dalka uu qofku ka soo jeedo ama u dhashay oo dhan ama lagu qasbay in uu ka cararo meeshii uu caadi ahaan u deganaa si uu magangelyo ugu doonto dal kale oo ka baxsan kiisii asalka ahaa ama uu u dhashay.

## Qodobka 50aad
## Codsiga Qaxootinimada

1. Qofka dalbanaya in loo aqoonsado Qaxootinimada waa in uu:
   b. ku sugan yahay gudaha dalka JFS; iyo
   t. si dhaqso ah u wargeliyaa Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda oo arrintaas u xilsaaran ama Hay'adda Qaxootiga Qaranka iyo Barakacayaasha.
2. Hay'adda Socdaalka iyo Jnsiyaddu waxay sameynaysaa diiwaan-gelinta kowaad ee dadka qaxootiga ah iyo kuwa magan-gelyo-doonka ah, marka ay yimaadaan dalka JFS, iyadaoo siinaysa oggolaansho degaan ku-meel-gaar ah, sidoo kalena xogtooda la wadaagaysa Hay'adda Qaxootiga Qaranka iyo Barakacayaasha iyo hay'adaha u xilsaaran amniga dalka.
3. Guddiga Qaranka ee go'aan-ka-gaarista Qaxootiga ayaa qiimeyn ku sameynaya codsiga qaxootinimada, go'aanna ka gaaraya.
4. Hay'adda Qaxootiga Qaranka iyo Barakacayaasha waxay qofka qaxootinimada dalbaday siinaysaa Aqoonsi sheegaya qaxootinimada codsadaha, ka dib marka ay hesho go'aanka Guddiga Go'aan-ka-gaarista Qaxootiga.

## Qodobka 51aad Oggolaansha ama Diidmada Codsiga Qaxootinimada

1. Dawladda JFS waxay u madax-bannaan tahay in ay siiso ama u diido qofka dalbaday magan-gelyo ama qaxootinimo, si waafaqsan Shuruucda dalka iyo Axdiga QM ee Geneva 1951.
2. Si waafaqsan faqradda (1) ee Qodobkan, ma saameynayso dadka magan-gelyo- doonka ah ee xoriyadooda iyo naftooda ay khatar ku gelayso dalkii ay ka soo jeedeen ama ka yimaadeen.
3. Hay'adda Qaxootiga Qaranku waxay ku oggolaanaysaa ama ku diidaysaa magan- galyodoonka go'aanka uu gaaro Guddiga Qaran ee Go'aan-ka-gaarista Qaxootiga si waafaqsan Sharciga Socdaalka iyo shuruucda kale ee dalka- JFS dhaqan-galka ka ah.

## Qodobka 52aad Xubnaha iyo Shaqada Guddiga Go' aan-ka-gaarista Qaxootiga

1. Guddiga Go'aan-ka-gaarista Qaxootiga wuxuu ka kooban yahay Sagaal (9) xubnood, waana sida soo socota:
   - b. Guddoomiyaha Hay'adda Qaxootiga Qaranka iyo Barakacayaasha;
   - t. Wakiil ka socda Wasaaradda Amniga Gudaha;
   - j. Wakiil ka socda Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda JFS;
   - x. Wakiil ka socda Wasaaradda Arrimaha Gudaha Federaalka;
   - kh. Wakiil ka socda Wasaaradda Arrimaha Dibedda;
   - d. Wakiil ka socda Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda;
   - r. Wakiil ka socda Taliska Ciidanka Booliska ederaalka;

s. Wakiil ka socda Hay'adda Qaxootiga Qaranka iyo Barakacayaasha; iyo sh. Wakiil ka socdo Wasaaradda Caddaaladda.

2. Guddigani wuxuu wada-shaqeyn dhaw la yeelanayaa Hay'adda Qaramadda Midoobay u qaabilsan Qaxootiga (UNHCR) si ay u xaqiijiyaan gudashada waajibdkooda.
3. Shaqada Guddiga Qiimeynta Qaxootinimada waa qiimeynta iyo go'aan-ka-gaarista codsiyada qaxootinimada si waafaqsan Sharciga Socdaalka iyo Sharciga Qaxootiga Qaranka.
4. Guddiga waxaa shir-guddoominaya Guddoomiyaha Hay'adda Qaxootiga Qaranka iyo Barakacayaasha sida ku cad faqradda (1) ee isla Qodobkan, waxayna shaqada Guddigu tahay:

b. oggolaanshaha iyo bixinta magan-gelyada Qaxootinimo; ama

t. diidmada magan-gelyada Qaxootinimada oo sababaysan.

## CUTUBKA SAGAALAAD

## CIQAABTA SAARAN SHAKHSIYAADKA KU XAD-GUDBA XEER-NIDAAMIYAHA

### Qodobka 53aad

### Gefaf Guud

1. Qofka kasta oo geysta xad-gudub lid ku ah Xeer-nidaamiyaha ama Sharciga Socdaalka waxaa dacwadiisa loo gudbinayaa maxkamadda awoodda u leh go‟aan-ka-gaaristiisa, iyadoo lagu abaal-marinayo si waafaqsan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed (XCS).

2. Qof kasta oo si kas ah ama ku-talo-gal ah u caawiyo qof kale in uu dalka ku soo galo ama uga baxo si xad-gudub ah ama ka hor-imanaysaa xeer-nidaamiyahan iyo sharciga socdaalka wuxuu mudanayaa ciqaabta ku habboon ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.
3. Qof kasta oo sameeya ka-gudbin ama ka-bixid bar-xuduudeedka JFS isagoo aan ka haysan wax fasaxa ama oggolaansho ah Sarkaalka HSJS wuxuu mudanayaa ciqaabta ku habboon ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.
4. Qof kasta oo si ku-talo-gala ah u siiyo qof kale kaalmo ama u oggalaado soo-gelidda ama ka-bixidda dalka JFS, isagoo jebinaya xeer-nidaamiyahan ama Qodobka 53[aad] ee Sharciga Socdaalka wuxuu mudanayaa ciqaabta ku habboon ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.
5. Qof kasta oo diida in uu jawaab siiyo sarkaalka HSJS marka laga codsado wuxuu mudanayaa ciqaabta ku habboon ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.
6. Qof kasta oo sheegta dokumenti ama baasaboor safar ee uusan lahayn wuxuu mudanayaa ciqaabta ku habboon ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.
7. Qof kasta dokumentigiisa ama baasaboorkiisa u oggolaada in uu qof kale adeegsado isagoo u isticmaalaya safar sharci-darro ah, sida:
   b. si uu ugu tahriibo ama dalka uga baxo sifo sharcidarro ah;
   t. in uu ka sameeyo lacag isagoo iibsanaya baasaborkiisa ama dokumentiga si uu ugu baxo qof kale; ama

j. in uu ku baxsado qof ku jira liiska dadka aan loo oggoleyn in ay dalka ka baxaan.

8. Qofka lagu helo isagoo ku safraya baasaboor ama dokumenti safar oo aan waafaqsanayn xogtiisa shakhsiyadeed, wuxuu muctaysanayaa ciqaabta uu mudan yahay ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed, sida:

   b. in aysan is-waafaqsanayn sawirka baasoorka ku dhegan iyo qofka wata;

   t. in aysan is-lahayn magaca qofka leh baasaboorka iyo qofka ku safrayo ama haysta dokumentiga; ama

   j. in aysan is-lahayn xogaha kale ee lagu xuso ama laga helo dokumentiga ama baasaboorka safarka.

9. Qof kasta oo awoodi-waaya ka-jawaabidda su‟aalaha uu weydiiyo Sarkaalka HSJS ee la xariira bixinta macluumaad been-abuur ah, wuxuu mudanayaa ciqaabta ku habboon ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed (XCS).

## Qodobka 54aad

### Gefafka iyo Ganaaxyada Cayiman Ee Ka Dhasha Ku Xad-gudubka Xeer-nidaamiyahan

1. Qof kasta ama Sarkaalka oggolaada, isagoo aan fasax u qabin, ka-been-abuurid dokumenti dawladeed waxaa arrintiisa loo gudbinayaa maxkamada awoodda u leh go‟aan-ka gaaristiisa, dokumentiyadaas waxay noqon kara:

   b. Baasaboor waa dokumenti dal sameystay lana aqoonsan yahay dal kalena lagu geli karo loogana soo bixi karo sifa sharci ah;

t. dal-ku-gal waa oggolaansho (entry clearance/visa) dal-ku-gal ah oo loo oggolaaday in uu qofku dalkaas ku galo sifo sharci ah;

j. dal-ku-joog waa rukhsad oggolaansho ah oo qof ajnabi ah ku joogi karo dalka JFS; iyo

x. warqadaha rasmiga ah sida dokumentiyada ee loo oggol yahay in ay ku baxaan shaqaalaha dawladda.

2. Tahariibinta dadka ama qof kasta oo fududeeya isagoo u maraya sifo sharci-darro ah waxaa loo gudbinayaa maxkamadda awoodda u leh go‟aan-ka-gaaristooda.
3. Xeer-nidaamiyahan wuxuu mamnuucayaa ama gef ka dhigayaa qof kasta oo lagu helo safrinta dadka si jinsi ahaan looga ganacsado jirkooda, ama qofka in loogu shaqeysto sifo sharci-darro ah iyo ku xad-gudubka caruurta yaryar arrimihaas waxaa go‟aanka gaaraya ciqaabtooda maxkamadda awoodda u leh.
4. Qofka ajnabiga ah ee sii jooga waqtiga ka badan oggolaanshaha hore loo siiyey waxaa ku soconaya lacag dhan US$10 (toban Doolarka Maraykanka) maalintii sida uu qabo Qodobka 53aad (4) ee Sharciga Socdaalka Soomaaliya.

**Qodobka 55aad Fulinta iyo Hirgelinta Xeer-nidaamiyahan**

1. Fulinta xeer-nidaamiyahan iyo hirgelintaiisa waxaa u xilsaaran dhammaan ha‟yaddaha fulinta heer Federaal iyo heer Dawlad-goboleed ee ku shaqada leh hawlaha uu xeernidaamiyahan xeerinayo.
2. Dhaqan-gelinta xeer-nidaamiyahan waxaa mas‟uuliyad gaar ahi ka saaran tahay Hay‟adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed

(HSJS), iyadoo kaashanaysa dhammaan hay‟adaha kale ee dawladda ee ay wada-shaqeynta la leedahay.

**Qodobka 56aad**
**Xeer-nidaamiyeyaal iyo Hab-raaaacyo**

1. Xeer-nidaamiyeyaasha iyo Hab-raacyada lagu hirgeliyo sharcigan waxaa soo diyaarinaya

   Agaasimaha Guud ee Hay‟adda, ka dib Soo-jeedinta Wasiirka waxaa ansixinaya Golaha Wasiirrada Xukuumadda JFS.
2. Agaasimaha Guud ee HSJS waxaa kale oo uu soo saarayaa Hab-raacyo iyo Xeer- hoosaadyo lagu dardar-gelinayo hawlaha ay u xilsaaran tahay Hay‟addu, hadba waqtiga ay kula habboonaato.
3. Haddii ay dhacdo in iska-hor-imaad dhex maro Xeer-nidaamiyahan iyo

Xeernidaamiyeyaal hore u jiray, waxaa la raacayaa Xeer-nidaamiyahan dambe.

**Qodobka 57aad**

**Baabi'in**

Xeer-nidaamiyahani wuxuu baabi‟inayaa xeer kasta oo ka hor-imaanaya ama aan la socon karin xeer-nidaamiyahan oo ku saabsan arrimaha Socdaalka JFS.

**Qodobka 58aad**

## Dhaqan-gal

Xeer-nidaamiyahani wuxuu dhaqan-gelayaa markuu ansixiyo Golaha Wasiirrada ee Xukuumadda JFS, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ee Dawladda JFS.

HAY'ADDA SOCDAALKA IYO JINSIYADDA

IMMIGRATION AND CITIZENSHIP AGENCY OF SOMALIA

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

**Tariikh: 04/01/2024**

**Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.147**

**XEERKA: XEER-NIDAAMIYAHA SHARCIGA HAY'ADDA SOCDAALKA IYO JINSIYADDA SOOMAALIYEED**

XRW - BIXIT
10 JAN 2024
OPM - EXIT

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 99aad farqadaha (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Warqadda summadeedu tahay **WC/AD/925/2023 ee ku taariikheysan 11/12/2023** kuna saabsan codsi soojeedinta Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Amniga Gudaha.

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.59.01.24** ee **04/01/2024,** kuna saabsan ansixinta **Xeer-nidaamiyaha Sharciga Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaliyeed'** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Markuu tixgeliyey:** Muhiimadda uu leeyahay meel-marinta **Xeer-nidaamiyaha Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaliyeed.**

**Wuxuu Meel-mariyey:**

**Qodobka 1aad**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.59.01.24 ee 04/01/2024,** kuna saabsan ansixinta - Xeer-nidaamiyaha sharciga Jinsiyadda Soomaliyeed"oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

### Qodobka 2aad

Waxaa Wasaaradda Amniga Gudaha loo igmaday in ay hir-geliso, meel-marisana Xeer-nidaamiyaha sharciga Hay'adda socdaalka iyo jinsiyadda soomaaliyed.

### Qodobka 3aad

**Xeer-nidaamiyaha Sharciga Hay'adda Socdaalka Jinsiyadda Soomaliyeed** waxa uu dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN. 003-2024
TAARIIKH: 18-2-2024
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA I XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

2023

## JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## WASAARADDA AMNIGA GUDAHA

*XEER-NIDAAMIYAHA*
*SHARCIGA HAY’ADDA SOCDAALKA IYO*
*JINSIYADDA SOOMAALIYEED*
*(Sharci Lr. 012 ee Maarso 20, 2023)*

## CUTUBKA KOWAAD
## QODOBBO GUUD

### Qodobka 1aad:
### Magaca Xeer-nidaamiyaha

Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu magacaabaa **"Xeer-nidaamiyaha Sharciga Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed".**

### Qodobka 2aad:
### Qeexid

1. Hay'ad: waxaa loola jeedaa Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed (HSJS);
2. Wasaarad: waxaa loola jeedaa Wasaaradda Amniga Gudaha ee Xukuumadda JFS;
3. Wasiir: waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha ee Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS);
4. Agaasimaha Guud: waxaa loola jeedaa Agaasimaha Guud ee Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed (HSJS);
5. Sarkaal: waxaa loola jeedaa hawl-wadeen ka tirsan Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed oo shaqadiisu tahay fulinta waajibaadka sharci ee Hay'adda;
6. Mudnaan gaar ah: waxaa loola jeedaa hannaan shaqo-fulineed iyo mid xuquuqeed (Special Status) oo hay'adda iyo shaqaalaheeda uga duwan tahay hay'addaha kale ee dawladda sida ku cad Xeer-nidaamiyahan;
7. Khidmo-dhaaf: waxaa loola jeedaa Dal-ku-joog lacag-la'aan ah (gratis) oo uu bixiyo Agaasimaha Guud ee HSJS;
8. Xeer-nidaamiye: waxaa loola jeedaa Xeer-nidaamiyaha lagu hirgelinayo Sharciga

Hay'adda, waxaana soo diyaarinaya Agaasimaha Guud ee Hay'adda oo u gudbinaya Wasiirka, si looga ansixiyo Golaha Wasiirrada ee Xukuumadda JFS;

9. Xeer-hoosaad: waxaa loola jeedaa Xeer-hoosaad (Code of Practice) ay si gaar ah ugu dhaqanto HSJS, uuna soo saaro Agaasimaha Guud ee Hay'adda, kaasoo lagu dardargelinayo hawlaha ay u xilsaaran tahay Hay'addu;
10. U-qeybsane (immigration attachee): waxaa loola jeedaa mas'uulka Hay'adda wakiilka uga ah Safaarad ama Qunsuliyad Guud ee JFS;
11. Bar-xuduudeed: waxaa loola jeedaa goob ay dawladda Soomaaliya u asteysay in laga soo galo ama looga baxo xuduudda (berri, bad ama garoon diyaaradeed) ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
12. Dal-ku-joog: waxaa loola jeedaa rukhsad deganaansho Sharci ah oo la siiyo qof Ajnabi ah ama Soomaali wata Baasaboor Ajnabi ah;
13. Dal-ku-gal: waxaa loola jeedaa rukhsad oggolaansho sharci ah oo ay bixisay

    Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda lana siiyo qof Ajnabi ah, si uu u soo galo dhulka JFS;
14. Oggolaansho deganaansho rasmi ah: waxaa loola jeedaa rukhsad oggolaansho rasmi ah oo la siiyo qof ajnabi ah oo si rasmi ah dalka u degan, taasoo waqtigeedu dhammaanayo haddii uu ajnabiga la siiyey uu dalka ka maqnaando muddo ka badan 6 (lix) bilood oo xiriir ah;
15. HSJS: waxaa loola jeedaa Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed; iyo 16. JFS: waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

## Qodobka 3aad:
## Ujeeddada Xeer-nidaamiyaha

1. Xeer-nidaamiyahani wuxuu nidaaminayaa qaab-dhismeedka, waajibaadka iyo hannaanka maamul ee Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed (HSJS), si waafaqsan Qodobbada Sharciga Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed (Sharci Lr. 012 ee Maarso 20, 2023).
2. Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu fududaynayaa hirgelinta Sharciga Dhismaha Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed (HSJS) oo u xilsaaran maamulidda iyo maareynta socdaalka dalka si waafaqsan Dastuurka JFS iyo Sharciyada kale ee Dalka, iyadoo Hay'addu leedahay Sharciyad Qaanuuni ah iyo madax-bannaani ay ku gudato xilka iyo waajibaadka loo idmaday.
3. Xeer-nidaamiyahani wuxuu si qayaxan u caddeynayaa awoodaha, xilalka iyo waajibaadka Hay'adda si waafqsan Sharciga Hay'adda.
4. Hay'addu, marka ay gudanayso xilalka iyo waajibaadka loo idmaday, waxay u madaxbannaan tahay fulinta hawlaheeda, waxayna mar walba u hoggaasamaysaa

   Dastuurka, Sharciga Hay'adda, Xeer-nidaamiyahan iyo shuruucda kale ee JFS dhaqan-galka ka ah.
5. Hay'addu waxay leedahay hab-raacyo lagu fuliyo hawl-maalmeedkeeda shaqo (operational procedures) oo waafaqsan shuruucda iyo xeer-nidaamiyeyaasha

   Hay'adda, waxaana soo saaraya Agaasimaha Guud ee HSJS, si waafaqsan Qodobka 16aad ee Sharci Lr. 012 ee Maarso 20, 2023 oo lagu dhisay Hay'adda.

### Qodobka 4aad:

### Baaxadda iyo Hirgelinta Xeer-nidaamiyaha

1. Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu hirgelinayaa Sharciga Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed oo ah Hay'ad leh awood sharci-fulineed, mid maamul iyo siyaasadeed ee arrimaha socdaalka iyo qeybta hay'adda ka khuseysa hawlaha jinsiyadda, si waafaqasan Sharciyada dalka ee dhaqan-galka ah.

2. Xeer-nidaamiyahani wuxuu koobayaa dhammaan baahiyaha kala duwan ee ku xeeran hawl-maalmeedka Hay'adda, si waafaqsan Sharciga Hay'adda iyo shuruucda kale ee dalka JFS.

**Qodobka 5aad:**

**Shakhsiyadda Qaanuuneed ee Hay'adda**

3. Hay'addu waxay leedahay shakhsiyad qaanuuneed oo ay wax ku lahaan karto, wax ku dacweyn karto, laguna dacweyn karo, kuna geli karto heshiisyo dhaqan-gal ah (legallybinding agreement) oo lagu fududeynayo hawlaha lagama-maarmaanka u ah Hay'adda, si waafaqsan Sharciga Hay'adda, Xeer-nidaamiyahan iyo sharciyada kale ee dalka JFS.
4. Hay'addu waxay wada-shaqeyn la leedahay, isla markaana la hawl-gashaa hay'adaha fulinta sharciga, sida Booliska, Nabad-sugidda, Xeer-ilaalinta iyo Garsoorka, si waafaqsan Sharciga Hay'adda, Qodobka 9aad (1) ee Sharci Lr. 012, Maarso 20, 2023 iyo shuruucda kale ee dalka JFS dhaqan-galka ka ah.

**Qodobka 6aad:**

**Astaanta Hay'adda**

Astaanta Hay'addu waa gorgor duulaya oo ay ku wareegsan yihiin labo caleemood oo kor ku leh xiddig, hoosna uga dhagan gaashaan ku midabeysan calanka JFS, uuna ku qoran yahay magaca hay'adda oo dhammeystiran, sida ku cad lifaaqa 1aad ee Xeer-nidaaamiyahan lagu dhaqan-galinayo Sharciga Hay'adda, Sharci Lr. 012 ee Maarso 20, 2023.

**Qodobka**

**7aad: Xarunta**

**Dhexe ee Hay'adda**

1. Xarunta Dhexe ee Hay'adda waa Magaalo-madaxda JFS ee Muqdisho, waxayna laamo ku leedahay Dawlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka (DXF) iyo xafiisyo ka hawlgala Safaaradaha iyo Qunsuliyadaha Guud ee JFS ku leedahay dalalka dibadda.

2. Iyada oo la ilaalinayo Shuruucda iyo Xeerarka Hay'adda, xafiis kasta oo ka jira
Laamaha, Safaaradaha iyo Qunsuliyadaha Guud, waxay toos ula shaqeynayaan Waaxyaha iyo Xafiisyada Xarunta Dhexe ee u xilsaaran hawlaha ay hayaan, waxayna warbixin ka siinayaan natiijada waxqabadkooda Agaasimaha Laanta, Safiirka Safaaradda ama Qunsulka Guud.

## Qodobka 8aad:

## Mas'uuliyadda iyo Waajibaadka Hay'adda

1. Horumarinta iyo fududeynta dhammaan adeegyada la xiriira socdaalka iyo inta ka khuseysa adeegyada jinsiyadda.
2. Bixinta noocyada dokumentiyada kala duwan ee safarka, oggolaanshaha dal-ku- galka, dalku-joogga iyo degenaanshaha.
3. Hubinta iyo sugidda dhaqdhaqaaqa dadka socotada ah ee irdaha dalka laga soo galo, loogana baxo.
4. Diiwaan-gelinta ugu horeysa ee qaxootiga iyo dadka magan-gelyo-doonka ah, markuu ka gudbo hab-raaca hay'adda, iyo siinta dal-ku-joog ku-meel-gaar ah, iyadoo lala wadaagayo xogtiisa Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka iyo hay'adaha u xilsaaran amniga dalka.
5. Hubinta, baarista iyo xaqiijinta dokumentiyada socdaalka ee dadka soo gelaya ama ka baxaya dhammaan bar-xuduudeedyada dalka.
6. Hubinta iyo keydinta xogta muwaadiniinta iyo ajaanibta.
7. Ka-qeyb-qaadashada maareynta qaxootiga iyo dadka magan-gelyo-doonka ah, iyadoo la waafajinayo Dastuurka, Sharciga

Qaxootiga dalka iyo shuruucda Caalamiga ah oo ay Soomaaliya qeybta ka tahay.

8. Bixinta aqoonsiga dal-ku-joogga Qaxootiga ka dib marka la aqbalo qofka codsigiisa Qaxootinimo.
9. Musaafurinta iyo hakinta safarrada dadka, iyadoo fulinaysa amarrada maxkamadeed iyo go'aannada siyaasadeed ee xukuumadda JFS iyo danta guud ee Qaranka.
10. Xaqiijinta codsiga jinsiyad-siinta Ajnabiga deganaanshaha rasmiga ah leh markuu soo dalbado dhalashada Soomaalinimo iyo hubinta in uu buuxiyey shuruudaha looga baahnaa.
11. Fulinta shuruucda iyo heshiisyada caalamiga ah ee la xariira socdaalka ee ay JFS qeybta ka tahay.
12. Ka-hortagga dhammaan dembiyada la xiriira socdaalka iyo jinsiyadda.
13. La-dagaallanka tahriibinta iyo ka-ganacsiga dadka si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan, Sharciga Hay'adda, Sharciga Socdaalka iyo shuruucda kale ee dalka.
14. Meel-marinta xeer-nidaamiyeyaasha iyo hab-raacyada shaqo ee uu soo saaro Agaasimaha Guud ee Hay'adda.
15. Isku-xirka iyo hoggaaminta hay'adaha ka hawl-gala irdaha dalka laga soo galo ama looga baxo.
16. La-shaqeynta haya'daha Fulinta Sharciga ee ay hay'addu qeybta ka tahay
17. Diyaarinta Siyaasadaha lagu maareynayo muwaadiniinta dalka dib ugu soo laabanaya iyo hoggaaminta qorshaha lagu hirgelinayo.

## Qodobka 9aad:

## Awoodaha Hay'adda

1. In ay Hay'adaha Garsoorka u gudbiso qof kasta oo eedeysane ama dembile ah oo ay maxkamad ama Booliska Caalamiga ah u soo gudbiyaan macluumaadkiisa, iyo qof kasta oo lagu helo mid

ka mid ah dembiyada ku qeexan Sharciga Hay’adda Socdaalka iyo Jinsiyadda iyo Xeer-nidaamiyeyaasha lagu meel-mariyo.

2. Haysashada iyo isticmaalka hub u gaar ah, nooca hubka fudud, ee sharcigu u oggol yahay, lana diiwaan-geliyey oo lagu ilaalinayo nafta hawl-wadeennada Hay’adda iyo gudashada waajibaadkooda shaqo.
3. In ay ka hawl-gasho gudaha dalka, bar-xuduudeedyada, safaaradaha iyo Qunsuliyadaha JFS ay ku leedahey dalalka dibadda, iyadoo si mideysan ugu shaqeynaysa Shuruucda Hay’adda ee dhammaan goobaha ay ka hawl-gasho.
4. Bixinta, cusbooneysiinta iyo la-noqoshada noocyada kala duwan ee baasaboorada

   JFS iyo dokumentiga kale ee safarka si waafaqsan Sharciga Hay’adda, Sharciga Socdaalka iyo Sharciga Baasaboorka JFS.
5. Bixinta, Diidmada, Laalista iyo Kala-noqoshada noocyada kala duwan ee oggolaanshaha dal-ku-galka, dal-ku-joogga iyo deganaaanshaha dalka JFS.
6. Bixinta oggolaanshaha guryo-noqodka (go home) ee la siiyo muwaadiniinta ku sugan dalka dibaddiisa ee aan haysan baasaboor shaqeynaya, sida ku cad Sharciga Socdaalka JFS.
7. Musaafurinta ajaanibta iyo hakinta safarka socdaaleyaasha xaaladaha uu jideynayo Sharciga Socdaalka.
8. Fulinta iyo qabashada awoodaha kale ee ay siinayaan Dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka JFS dhaqan-galka ka ah.

## Qodobka 10aad:

## Sugidda Amniga Shaqada iyo XarumahaHay’adda

1. Taliyaha Ciidanka Boliiska Federaalka ayaa soo asteynaya Cutub gaar ah oo la shaqeynaya Hay'adda.
2. Cutubka gaarka ah ee Ciidanka Booliska Soomaaliyeed ee loo asteeyay Hay'adda, waxay ku shaqeynayaan awoodda, amarrada

maamul iyo hawl-gelin ee Agaasimaha Guud ee Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed.

3. Cutubka Ciidanka Booliska ee ku kaaban Hay'adda wuxuu gudanayaa:

b. sugidda Amniga Xarumaha, hawl-wadeennada iyo madaxda Hay'adda;

t. in uu Hawl-wadeennada Hay'adda kala hawl-galo ilaalinta, gaaf-meerka iyo xakameynta amniga bar-xuduudeedyada dalka JFS; iyo

j. fulinta go'aannada iyo amarrada Hay'adda ee la xariira qabashada eedeysaneyaasha iyo horgeynta Cadaaladda, iyagoo u maraya hab-raacyada sharci ee dalka.

## Qodobka 11aad:

## Hawl-galka Hay'adda

Hay'addu waxay ka hawl-gashaa dhammaan dalka JFS, waxayna leedahay xafiisyo ka hawlgala Safaaradaha iyo Qunsuliyadaha Guud ee JFS ku leedahay dalka dibaddiisa, waxayna leedahay:

b. Saraakiil gudanaysa waajibaadkooda gaarka ah ee heer Federaal;

t. Hannaan maamuus iyo lebbis u gaar ah oo ay ku xardhan yihiin astaanta Hay'adda; iyo

j. Saraakiil u tababaran sugidda iyo gaaf-meerka dhaqdhaqaaqa xuduudaha isla markaana wata hubka fudud iyo gaadiid ku qalabaysan aaladaha socdaalka.

x. Iyadoo la tixgalinayo hawlaha xasaasiga ah, xogaha amni ee ay gacanta ku hayaan iyo ahmiyadda ay Qaranka u leeyihiin hawlahaasi, sarkaalka ka tirsan hawl-wadeenada hay'adda lama handadi karo laguma xad-gudbi karo xoriyadiisa lamana xiri karo hadii aan lagu qaban iyagoo fal-dambiyeed gacanta kula jira.

Kh. Wixii eedeyno tuhun ah waxaa loo gudbinayaa qaab qoraal ah Agaasimaha Guud ee hay'adda si uu u darso kadibna u qaato talaabada ku haboon.

d. Saraakiisha hay'adda iyagoo gudanaya waajibaadkooda shaqo, lagama hor-istaagi karo marka ay booqdaan goobaha ay ku sugan yihiin ajaanib ay doonayaan saraakiishu inay xogtooda helaan, is hortaagii lagu sameeyana waxaa loo aqoonsanayaa fal-dambiyeed ay ka dhalanayso ciqaab.

## Qodobka 12$^{aad}$: Ilaalinta Hufnaanta Shaqo ee Hay'adda

1. Ilaalinta mabaadi'da aasaasiga ah ee hufnaanta iyo shaqo wanaagga hay'adda.
2. Dhawrista iyo u-hoggaansanaanta hab-raacayada xeer-nidaamiyahan, sharciyada kale ee dalka iyo siyaasadaha gaarka ah ee Hay' addu leedahay.
3. Wada-shaqeynta iyo ilaalinta hannaanka kala-sarreynta shaqo ee Hay'adda.
4. Ixtiraamka sarreynta sharciga iyo talinta sharciga waqti kasta iyo goob kasta.
5. Daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka ku aaddan hawl-qabadka Hay'adda.

## CUTUBKA LABAAD QAAB-DHISMEEDKA IYO HAB-MAAMULKA HAYA'ADDA

### Qodobka 13aad:
### Qaab-dhismeedka Hay'adda

1. Hay’adda Socdaalka iyo Jinsiyadda waxay ka hawl-gashaa Xarunta Dhexe ee Muqdisho, laamaha Dawlad-goboleedyada iyo dhammaan Safaaradaha iyo Qunsuliyadaha Guud ee JFS, waxayna ummadda Soomaaliyeed u haysaa adeeg baaxad weyn oo isugu jira sameynta Dokumentiyada safarka iyo ka-shaqeynta dhammaan hawlaha la xiriira Socdaalka iyo maareynta xuduudaha dalka.
2. Xeer-nidaamiyahani wuxuu si faahfaahsan u qeexayaa hawlaha shaqo iyo waajibaadka Agaasimaha Guud, Ku-xigeennada Agaasimaha Guud, La-taliyeyaasha, Agaasime Waaxeedyada, Madaxda Laamaha, Madaxda Xafiisyada iyo U- qeybsaneyaasha Hay’adda Socdaalka iyo Jinsiyadda.
3. Qaab-dhismeedka guud ee Hay’addu wuxuu ka kooban yahay 2 (labo) tiir oo waaweyn oo kala ah:
   b. Socdaalka (Immigration); iyo
   t. Jinsiyadda (Citizenship).
4. Madaxda iyo Hawl-wadeennada Hay’addu waxay leeyihiin mansabyada hoos ku faahfaahsan:
   b. Agaasime Guud;
   t. 2 (labo) Agaasime Guud Ku-xigeen:
      i. Agaasime Guud Ku-xigeenka Socdaalka; iyo
      ii. Agaasime Guud Ku-xigeenka Jinsiyadda.
   j. La-taliyeyaal;

x. Agaasimeyaal

Waax; kh.Madax

Laameedyo;

d. Madax Xaafiisyo;

r. Kormeereyaal; iyo

s. U-qeybsaneyaal Socdaal (Immigration Attachees)

## Qodobka 14aad:

## Shuruudaha Magacaabista iyo Xil-ka-qaadista Agaasimaha Guud iyo Kuxigeennadiisa

Shuruudaha Magacaabista iyo Xil-ka-qaadista Agaasimaha Guud ee Hay'adda iyo Kuxigeennadiisa waxaa loo marayaa sida ku cad Qodobbada 14aad iyo 15aad ee Sharciga Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed (HSJS), Sharci Lr. 012 ee Maarso 20, 2023.

## Qodobka 15aad:

## Hab-raaca Magacaabista Agaasimaha Guud ee Hay'adda iyo Ku- xigeennadiisa

1- Magacaabista Agaasimaha Guud ee Hay'adda waxaa soo jeedinaya Wasiirka, waxaana ansixinaya Golaha Wasiirrada ee Xukuumadda JFS, ka dib waxaa Xeer Madaxweyne ku magacaabaya Madaxweynaha JFS si waafaqsan Qodobka 117aad ee Dastuurka KMG ah ee JFS. Magacaabista Ku-xigeennada Agaasimaha Guud waxaa soo jeedinaya Wasiirka, waxaana ansixinaya Golaha Wasiirrada, Xukuumadda JFS.

2- Magacaabista Ku-xigeennada Agaasimaha Guud waxaa soo jeedinaya Wasiirka, waxaana ansixinaya Golaha Wasiirrada, Xukuumadda JFS.

## Qodobka 16aad:
## Xilka iyo Awoodaha Agaasimaha Guud

1. Waa Madaxa iyo Hoggaanka ugu sarreeya Maamulka Hay'adda si waafaqsan Qodobka 16aad ee Sharciga Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed.
2. Wuxuu mas'uul ka yahay waajibaadka fulineed ee hawl-maalmeedka Hay'adda si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan, Sharciga Hay'adda iyo shuruucda kale ee dalka.
3. Wuxuu u xilsaaran yahay ilaalinta awoodaha iyo mas'uuliyadaha qaab- dhismeedka Hay'adda ee ku xusan Qodobka 13aad ee Sharciga Hay'adda.
4. Maareynta, iskuduwidda iyo kormeerka hawlaha Hay'adda iyo hawl-wadeennada si waafaqsan xeer-nidaamiyahan, Sharciga Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda, iyo shuruucda kale ee dalka JFS.
5. Diyaarinta iyo dejinta istiraatijiyad cad oo kor loogu qaadayo, laguna maamulayo hawlaha hay'adda.
6. Saxiixa heshiisyada ay hay'addu kula gelayso Hay'adaha dhigeeda ah ee heer Caalami, heer Qaaradeed ama heer Gobol ee dalalka kale.
7. Xoojinta xiriirka hawlaha adeegga iyo wada-shaqeyn ee kala dhaxeea hay'adaha dawladda iyo kuwa caalamiga ah.
8. Magacaabista iyo awood-siinta La-taliyeyaasha, Agaasimeyaasha Waaxyaha, Madaxda Xafiisyada, Madaxda Laamaha ka hawl-gala Dawladaha Xubnaha ka ah Federaalka iyo U-qeybsaneyaasha ka hawl-gelaya Safaaradaha iyo Qunsuliyadaha Guud ee JFS.
9. Bixinta dal-ku-joogga khidmo-dhaafka (Gratis) ah iyo ka dhaafidda ganaaxyada dal-ku-joogga muddo-dhaafka ah.
10. Magacaabista iyo awood-siinta Guddiyada hawl-fulineed ee Hay'adda.
11. Meel-marinta ku-dhaqanka qorshaha miisaaniyadda iyo diyaarinta Qiyaasta Miisaaniyad-sannadeedka Hay'adda.

12. Agaasimaha Guud wuxuu awoodaa, haddii uu u arko dan guud, in uu shaqada iyo mushaarkaba ka joojiyo shaqaalaha lagu soo eedeeyay anshax-xumo ama faldembiyeed, inta go'aan rasmi ah laga gaarayo dacwadooda, si waafaqsan Sharciga Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda iyo shuruucda kale ee Dalka.
13. Isugu yeerista kulamada kala duwan ee maamulka Hay'adda, shir- guddoomintooda iyo talo-siintooda.

## Qodobka 17aad:

## Xilka iyo Waajibaadka Ku-xigeennada Agaasimaha Guud

14. Si waafaqsan Qodobka 18aad ee Sharciga Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed
    (SJS), Hay'addu waxay leedahay 2 (labo) Agaasime Guud Ku-xigeen oo kala ah;
    b. Agaasime Guud Ku-xigeenka 'Socdaalka' oo ah Ku-xigeenka Kowaad Agaasime Guud; iyo
    t. Agaasime Guud Ku-xigeenka 'Jinsiyadda' oo ah Agaasime Guud Ku-xigeenka Labaad.
15. Agaasime Guud Ku-xigeennadu waxay buuxiyaan kaalinta Agaasimaha Guud marka uu maqan yahay ama uusan gudan karin xilkiisa sababo jira awgood, iyagoo u kala horreynaya sida ay u kala mudan yihiin.
16. Agaasime Guud Ku-xigeenka 'Socdaalka' wuxuu leeyahay Xilka iyo Waajibaadka soo socda:
    b. U-hoggaansanaanta iyo fulinta awaamiirta Agaasimaha Guud ee Hay'adda;
    t. Maamulidda arrimaha khuseeya socdaalka;
    j. Fulinta waajibaadka uu u cayimo Agaasimaha Guud ee la xiriira hawlaha socdaalka;

x. Soo-jeedinta arrimaha muhiimka u ah horumarinta iyo tayeynta socdaalka; kh, ka-talo-bixinta siyaasadaha guud ee Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed; d. qorsheynta iyo shir-guddoominta kulamada hawlaha socdaalka;

r. Qabashada iyo fulinta hawlaha ee uu u idmado Agaasimaha Guud ee Hay'adda; iyo

s. Haddii ay Agaasimaha Guud ku timaado geeri ama xaalad caafimaad-darro oo joogto ah, sababtana in uu gudan-waayo waajibkiisa, Ku-xigeenka Agaasimaha Guud ee Socdaalka ayaa noqonaya Sii-hayaha Xilka Agaasimaha Guud ee Hay'adda inta uu soo noqonayo ama laga soo magacaabayo Agaasime Guud si waafaqsan Xeernidaamiyahan iyo Sharciga Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed (HSJS).

17. Agaasime Guud Ku-xigeenka 'Jinsiyadda' wuxuu leeyahay xilka iyo waajibaadka soo socda:

b. U-hoggaansanaanta iyo raacitaanka awaamirta Agaasimaha Guud ee Hay'adda;

t. Maamulidda arrimaha khuseeya Jinsiyadda;

j. Qabashada iyo fulinta waajibaadka uu u cayimo Agaasimaha Guud ee dhanka Jinsiyadda;

x. Soo-jeedinta arrimaha muhiimka u ah horumarinta iyo tayeynta Jinsiyadda; kh. Ka-talo-bixinta siyaasadaha guud ee Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed;

d. Qorsheynta iyo shir-guddoominta kulamada hawlaha Jinsiyadda; iyo

r. Qabashada hawlaha kale ee uu u idmado Agaasimaha Guud.

**Qodobka 18aad:**

**Xil-ka-qaadista Agaasimaha Guud iyo Ku-xigeennadiisa**

Xil-ka-qaadista Agaasimaha Guud iyo Ku-xigeennadiisa waxaa loo marayaa isla hab-raacii loo maray magacaabistooda, si waafaqsan Qodobka 15aad ee Xeer- nidaamiyahan.

**Qodobka 19aad:**

**Dabeecadda Hay'adda**

1. Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyaddu waa hay'ad ka gudata waajibaadkeeda heer federaal dhammaan geyiga JFS, oo leh mudnaan u gaar ah oo ay ku mutaysatay xirfadda sare ee hawl-wadeennadeeda sida ku tilmaaman Qodobka 22aad ee Sharciga Hay'adda,waxayna ka kooban tahay 2 (labo) tiir oo waaweeyn oo kala ah: (b) Socdaalka; iyo (t) Jinsiyadda".
2. Hawl-wadeennada Hay'addu waxay isugu jiraan Rayid iyo Ciidan, waxay leedahay hannaan u gaar ah oo ay ku gudato waajibaabkeeda shaqo, labis u gaar ah oo ay ku xardhan tahay astaanta Hay'adda sida ku qeexan Qodobka 11aad ee Sharciga Hay'adda;
3. Hay'addu waxay leedahay unugyo u tababaran ilaalinta iyo gaaf-meerka xuduudaha oo la hawl-gala ciidanka Booliska, isla markaana ku hubeysan hub fudud iyo gaadiid ku qalabeysan aaladaha socdaalka.

## CUTUBKA SADDEXAAD
## HAWL-WADEENNADA HAY'ADDA IYO WAXYAABAHA KA REEBBAN

**Qodobka 20aad:**

**Ahmiyadda Hawl-wadeennada Hay'adda iyo Waajibaadkooda**

1. Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda waxay leedahay hawl-wadeenno u xilsaaran fulinta shaqooyinka kala duwan ee Hay'adda, waxayna isugu jiraan ciidan iyo rayid.
2. Hawl-wadeennada hay'adda waxay ka hawl-galaan Xarunta Dhexe ee Muqdisho, Laamaha Dawlad-goboleedyada iyo dhammaan Safaardaha iyo Qunsuliyadaha Guud ee JFS.
3. Shakhsiyadda qaanuuneed ee heer federaal ee Hay'adda, hawl-wadeennada waxay u suurto-gelinaysaa in ay siiyaan bulshada adeeg isku mid ah, si waafaqsan Dastuurka, shuruucda ay Hay'addu ku dhisan tahay iyo sharciyada kale ee dalka JFS.
4. Hawl-wadeennada waxay bulshada u hayaan shaqo baaxad weyn oo isugu jirta Baasaboor- sameyn iyo ka-shaqeynta dhammaan hawlaha la xiriira Socdaalka iyo maareynta xuduudaha dalka.

**B) Waajibaadka Guud ee Hawl-wadeennada HSJS-**

Xeer-nidaamiyahan wuxuu hagayaa tilmaamo cadna ka bixinayaa gudashada waajibaadka dhammaan mas'uuliyiinta iyo hawl-wadeennada HSJS, wuxuuna farayaa hawl-wadeen kasta oo ka mid ah Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda:

1. In uu u guto xilkiisa si ay ku dheehan tahay hufnaan, ixtiraam iyo qadarin madaxdiisa, shaqaalaha ay shaqo-wadaagga yihiin iyo bulshada uu u adeegayo.
2. In uu dhawro hantida (guurto iyo ma-guurto) iyo agabka kale ee Hay'adda.
3. In uu xafido sirta iyo xogta Hay'adda.
4. Ku-dhaqanka tilmaamaha ay farayaan hab-raacyada ku aaddan ilaalinta anshaxwanaagga, si loo dhawro sumcadda Hay'adda.
5. Ilaalinta kala-dambeynta iyo fulinta amarrada madaxda ka sarreysa iyo u-dhimrinta shaqaalaha uu mas'uulka ka yahay.
6. Sarkaal kasta oo loo idmaday shaqo, heer walba oo ay mas'uuliyadiisu gaarsiisan tahay, Hay`addu waxay ka filaysaa in uu u guto waajibaadkiisa si xilkasnimo leh oo waqtiyeysan.
7. Hawl-wadeen kasta waxaa waajib iyo mas'uuliyadi ka saaran tahay ilaalinta habdhaqanka guud iyo sumcadda Hay'adda.

8. Waxaa ku waajib ah in hawl-wadeennadu ay maanka ku hayaan in raad-reebka waxqabadkoodu ku xiran yahay hadba sida uu noqdo hab-dhaqanka iyo qaabka ay u gutaan shaqadooda.

**T. Hannaanka Maareynta Waaxyaha, Laamaha, Xafiisyada HSJS iyo Warbixintooda-**

1. Dhammaan Waaxyaha ka shaqeeya arrimaha maamulka HSJS, iyo Xafiisyada madaxabannaan waxay toos u hoostagaan, warbixintoodana u siiyaan Agaasimaha Guud ee Hay'adda, iyagoo u marinaya marinka saxda ah ee xafiiskiisa.
2. Dhammaan Waaxyaha ka shaqeeya arrimaha Socdaalka, waxay hoostagaan, warbixintoodana siiyaan Ku-xigeenka Agaasimaha Guud ee dhanka Socdaalka iyo Agaasimaha Guud si waqtiyeysan.
3. Dhammaan Waaxyaha ka shaqeeya arrimaha Jinsiyadda, waxay hoostagaan, warbixintoodana siiyaan Ku-xigeenka Agaasimaha Guud ee dhanka Jinsiyadda iyo Agaasimaha Guud si waqtiyeysan.
4. Ku-xigeennada Agaasimaha Guud, waaxyaha ay mas'uulka ka yihiin waxay ula wadaagayaan si todobaadle, bille iyo sanadle ah iyo goor walba oo munaasab ah Agaasimaha Guud ee Hay'adda. Sidoo kale, waxay fulinayaan amarrada, talooyinka iyo tilmaamaha Agaasimaha Guud ee ka soo baxa warbixinnada Waaxyaha.
5. Hay'adda waxay si rasmi ah uga hawl-gelaya Hawl-wadeenno wax-ku-ool ah, sida:

**J. La-taliyeyaasha Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda-**

1. Hay'addu waxay yeelaneysaa La-taliyeyaal leh mihnado aqooneed iyo xeel-dheeri waxtar u leh adeegyada ay bixiso Hay'addu, waxaana lagu xulayaa go'aanka

   Agaasimaha Guud ee Hay'adda, iyadoo lagu salaynayo baahida ay Hay'addu u qabto takhasusyada mihnadeed ee ay leeyihiin iyo baahida ay Hay'addu u qabto.
2. Tirada La-taliye ee ay Hay'addu yeelanayso waxay ku xiranaanaysaa hadba baahida markaas jirta.

3. Shaqada ay qabanayaan La-taliyeyaasha waxaa lagu faahfaahinayaa waajibaadkooda shaqo (ToRs).
4. Dhammaan La-taliyeyaasha Hay'adda waxay hoostagaan Agaasimaha Guud ee Hay'adda, waxayna qabanayaan shaqada uu u cayimo Agaasimaha Guud iyagoo wada-shaqeyn la yeelanaya Waaxyaha, Xafiisyadada, Laamaha iyo Ku-xigeennada Agaasimaha Guud ee Hay'adda.

**Agaasimeyaasha Laamaha Hay'adda-**

Agaasimeyaasha laamuhu waa Wakiilada Hay'adda ee Dawlad-gobaleedka Xubnaha ka ah Federaalka (DXF), waxayna mas'uul ka yihiin:

1. Ka-shaqeynta xiriirka u dhexeeya Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed iyo Dawlad-gobaleedka iyo laamaha amniga ee Dawlad-gobaleedka.
2. La-shaqeynta iyo hoggaaminta hay'adaha ka hawl-gala irdaha dalka ee Laamaha.
3. Diyaarinta qorshe-hawleedka Laanta.
4. Qaabeynta iyo isku-dubaridka hawlaha Laanta.
5. Maamulka Shaqaalaha Laanta.
6. Isku-xirka Laanta uu mas'uulka ka yahay iyo waaxyaha Xarunta Dhexe, Laamaha iyo Xafiisyada kale ee Hay'adda.
7. Fulinta amarrada Agaasimaha Guud.
8. Agaasimaha Laantu wuxuu warbixinadda hawlaha shaqo ee Laanta u gudbinayaa Waaxyaha ay khuseyso, wuxuuna ogeysiinayaa Agaasime Guud Ku-xigeenka u xilsaaran iyo Agaasimaha Guud.

**KH. Waajibaadka U-qeybsaneyaasha Hay'adda Socdaalka (Immigration Attachee)-**

U-qeybsanaha Hay'adda wuuu maamul ahaan hoos-tegayaa Safiirka ama Qunsulka Guud, wuxuuna u xilsaaran yahay dhammaan hawlaha la xariira Socdaalka iyo Jinsiyadda sida:

1. Bixinta dhammaan noocyada kala duwan ee dokumentiyada Safarka, isagoo fulinaya dhammaan shuruucda, xeer-

nidaamiyeyaasha iyo hab-raacyada hawlfulineed ee hay'adda, Sharciga Baasaboorka iyo xeer-nidaamiyihiisa iyo habraacyada shaqo-fulineed ee la xariira ee uu soo saaro Agaasimaha Guud.

2. Bixinta Baasaboorka iyo warqadda Guryo-noqoshada (go home).
3. Dalabaadka Dal-ku-galka laga bixiyo Safaaradaha dibadda iyo Qunsuliyadaha Guud.
4. U-qeybsanuhu, isagoo ilaalinaya sarreynta sharciga, Xeer-nidaamiyeyaasha iyo

   Sharciyada Hay'adda, kana fogaanaya wax kasta oo dhalin kara khilaaf, wuxuu dhawrayaa nidaamka iyo hannaanka maamul ee ka jira Safaaradda ama Qunsuliyadda uu ka hawl-galo.
5. Haddii la faro fulinta amrrro lid ku ah sharciga, wuxuu markiiba ku wargelinayaa madaxda sare ee Hay'adda, si looga gaaro go'aan sharci oo shaqada aan wax u dhimayn.

## Qodobka 21aad:

## Shuruudaha ka-mid-noqoshada Hawl-wadeennada Hay'adda

Si waafaqsan Qodobka 21aad Sharciga Hay'adda, qofka doonaya in uu ka mid noqdo Hawlwadeennada Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed (HSJS) waa in uu buuxiyaa shuruudaha soo socda:

b. In uu yahay muwaadin ka soo jeeda JFS oo muslim ah;

t. In da'diisu aysan ka yareyn 18 (siddeed iyo toban) sano;

j. In uu maskax ahaan fayo-qab yahay;

x. In aysan maxkamad ku xukumin fal-dambiyeed ciqaabeed, 5tii (shanti) sano ee u dambeysay;

kh. In uu soo dhammeystirtay muddadii tababarka iyo tijaabada ee ka-mid- noqoshada hawl- wadeennada rasmiga ah ee Hay'adda;

d. In uu haysto uga yaraan shahaado Dugsi Sare marka laga reebo shaqaalaha qabanaya shagooyinka hoose;

r. Taariikh-nololeedka (CV) codsadaha oo faahfaahsan;

s. Soo-gudbin nuqulka asalka ah ee shahaadooyinka waxbarashada, sida Jaamacadda, Dugsiga Sare, iyo hadii ay jiraan tababaro; sh. warqadda dembi- la'aanta ee ay bixiso Waaxda Dembi-baarista Booliska (CID); dh. shaqaalaha cusub waxaa looga baahan yahay in uu keeno 2 (labo) Mas'uul oo damiinta, kuwaas oo kala ah:

i. Sarkaal sare, xildhibaan, Wasiir ama mas'uul xil ka haya dawladda; iyo ii. Nabadoon ka diiwaan-gashan Wasaaradda Arrimaha Guddaha,

Xukuumadda JFS ama Dawlad-goboleedka; sh.

warqad caddeynaysa Dagmada uu degan yahay/tahay oo asal ah; dh. warqad caddeynaysa nooca dhiigga (blood group);

c. 2 (labo) Sawir oo Teesaro ah; iyo

g. baasaboor aan dhicin, warqadda dhalashada iyo sugnanta, Kaarka Aqoonsiga Qaran (National ID).

## Qodobka 22[aad]: Xuquuqda Asaasiga ah ee Hawl-wadeennada Hay'adda

1. Hawl-wadeennada ka tirsan Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda oo iskugu jira Ciidan iyo Rayid, isla markaana gacanta ku haya shaqooyin xasaasi ah oo u baahan xirfad sare oo muhimad weyna u leh Qaranka, waxay xaq u leeyihiin mushaar u dhigma heerarka kala duwan ee shaqaalaha rayidka ah iyo Ciidanka, iyadoo la siinayo mudnaan gaar ah (special status).
2. Saraakiisha HSJS waxay leeyihiin mudnaanta gaarka ah oo ay ku muteysanayaan xirfadahooda shaqo ee ku salaysan tiknoolojiyada casriga ah, xafidaada iyo gacan- ku-haynta xogaha amni, soo-xaraynta dakhliga adeegyada hay'addu bixiso iyo waqtiga dheeriga ah oo ay shaqeeyaan.
3. Mushaarka iyo gunnada lagu bixinayo mudnaanta gaarka ah ee lagu jaan-gooynayo xirfadooda iyo muhimadda shaqadooda waxaa lagu darayaa miisaaniyadda dawladda, iyadoo Hawl-wadeen kasta helayo:
    i. Mushaar iyo gunno bille ah oo ku jaan-go'an xilka, heerka xirfadiisa aqooneed, khibrad iyo muhimadda shaqada uu hay'adda u hayo;
    ii. Hawl-wadeenka ka tirsan ciidamada qalabka sida ama hay'ad rayid ah ee ereg ahaan uga hawl-gala Hay'adda, wuxuu mushaar ku leeyahay hay'addii uu ka tirsanaa, Hay'adduna waxay siinaysaa gunno u dhiganta mudnaanta xirfadiisa aqooneed iyo muhimadda hawsha uu u hayo

    Hay'adda; iii. Shaqaalaha Hay'addu waxay leeyihiin gunnooyin ka dheeri ah ciidamada iyo shaqaalaha Rayidka ah ee dawladda, waxayna ku helayaan mudnaan gaar ah oo ay ku mutaysanayaan xirfadahooda shaqo iyo saacadaha dheeraadka ah ee ay ka hawl-galaan goobaha shaqada;
    iv. Hawl-wadeennada Hay'addu waxay leeyihiin fasax-sanadeed 1 (hal) bil ah oo uu qaadanayo mushaarkiisa;

v. Daryeel caafimaad oo meel-mar ah waxaana lagu qeexayaa Hab-raac gaar ah oo uu soo saaro Agaasimaha Guud ee Hay'adda Socdaalka iyo

Jinsiyadda; vi. Fasaxyada maalmaha ciidaha iyo dabbaal-degyada Qaran si waafaqsan

Sharciga Shaqaalaha Rayidka; vii. Hawl-wadeennada shaqeeya waqtiyada dheeriga ah waxay leeyihiin xaquuq lagu jaan-gooyey mudnaanta gaar ah;

viii. Hawl-wadeenkii la yimaada hawl-karnimo iyo hal-abuur dheeri ah wuxuu yeelanayaa abaal-marin ay soo jeediyaan Guddiga Dallacaadda, Abaalmarinta iyo Anshaxa, waxaana bixinaya Agaasimaha Guud ee

Hay'adda; ix. Hawl-wadeenka ay ku caddaato inuu ka geystay tacadiyo shaqada dhexdeeda sida shaqo-ka-tegis fasax la'aan ah, ka-maqnaansho goobta shaqada oo aan cudur-daar lahayn ama xil-gudasho la'aan, waxaa laga qaadayaa talaabo u dhiganta fal-xumada uu geystay,. waxaana go'aan ka gaaraya Agaasimaha Guud ee Hay'adda, ka dib markuu helo soo-jeedinta

Guddiga Anshaxa iyo Abaal-marinta;

x. Talooyinka Guddigu waxay noqonayaan digniin loo geliyo galkiisa, ganaax, mushaar-ka-joojin muddo ku siman 30 (sodon) maalmood, ama mid uu ku waayi karo shaqada, iyadoo loo eegayo miisaanka fal-xumada uu geystay. xi. Dallacsiin markuu muteysto sida ay xeer-nidaamiyeyaasha Hay'addu tilmaamayaan; iyo

xii. In uu helo xuquuq kasta oo uu ku muteysto Sharciga,

Xeernidaamiyeyaasha, Hab-raacyada iyo go'aannada maamul ee madaxda Hay'adda.

## Qodobka 23aad: Waxyaabaha ka Reebban Hawl-wadeennada HSJS

Hawl-wadeennada Hay'adda waxaa ka reebban:

1. Faafinta iyo la-wadaagista xogta shaqada Hay'adda dhinac kale oo aysan khuseyn amar la'aan.
2. Ka-faa'iideysiga duruufaha muwaadiniinta iyo macaamiisha kale, iyadoo la adeegsanayo awoodda Hay'adda.
3. Ku-kicidda fal keeni kara kala-qeybsanaan Shaqaalaha dhexdooda ah, taasoo waxyeello u keeni karta habsami-u-socodka shaqada, sawir xunna ka bixin karta muuqaalka guud ee Hay'adda.
4. Ku-isticmaalka noocyada kala duwan ee maan-dooriyaha goobta shaqada.
5. Qabashada ama ka-mid-noqoshada shaqo kale oo ka hor-imaanaysa shaqada uu u hayo Hay'adda (conflict of interest).
6. In uu ka tago ama ka maqnaado Shaqadiisa isagoo aan oggolaansho ka haysan Madaxdiisa (dayacaad shaqo).
7. U-adeegsiga Qalabka iyo Waqtiga Shaqada, dano gaar ah oo ka baxsan danaha Shaqada ee Hay'adda.
8. Ku-milmidda arrimaha siyaasadda iyo xil ka qabashada urur siyaasadeed.
9. Faafinta xog been-abur ah iyo dacaayad hay'adda dhexdeeda.

**Qodobka 24aad:**

**Anshax-marinta Hawl-wadeennada Hay'adda**

1. Hawl-wadeen kasta oo ka tirsan Hay'adda oo gala fal lid ku ah xeer- nidaamiyahan, waxna u dhimaya anshaxa iyo dhaqanka hay'adda waxaa loo anshax- marinayaa si waafaqsan Shareecada Islaamka, Sharciyada Ciidanka, Sharciga Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda iyo Sharciyadda Hay'adda.
2. Si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan iyo Sharciga Hay'adda, Hay'addu waxay leedahay
   Guddiga Dallacaadda, Abaal-marinta iyo Anshaxa oo ka kooban 5 (shan) illaa 7 (todobo) xubnood, waxaana hannaanka anshax ee la marinayo shaqaalaha oo faahfaahsan lagu soo saarayaa Hab-raac uu soo saaro Agaasimaha Guud ee Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda.

3. Guddiga Dallacaadda, Abaal-marinta iyo Anshaxa markay qaadayaan tallaabo anshaxmarin waxay raacayaan sida ku cad Sharciga Shaqaalaha Rayidka Dawladda, Sharciyada Ciidanka iyo Hab-raacyada Anshax-marin ee Hay'adda.

### Qodobka 25aad:
### Waayidda Xubinnimada Hay'adda

Hawl-wadeennada Hay'adda waxay xubinnimadooda ku waayi karaan mid ka mid ah arrimaha soo socda:

1. In uu ka rukhsaysto shaqada ama iskaga tago fasax la'aan iyo ogaal la'aan.
2. In Maxkamad ay ku xukunto xukun Maxkamadeed oo gaaraya 5 (shan) sano.
3. Xubinta oo aqbasho xil kale.
4. Xil-gudasha la'aan si waafaqsan hab-raaca Xeer-nidaamiyaha Hay'adda.
5. Geeri ku timaada.

## CUTUBKA AFARAAD
## MIISAANIYADDA, HANTI-DHAWRKA IYO WARBIXINSANADEEDKA HAY'ADDA

### Qodobka 26aad:
### Miisaaniyadda Hay'adda

1) Hay'addu waxay leedahay miisaaniyad u gaar ah oo ka mid ah miisaaniyadda guud ee Qaranka si ay hab-sami ugu gudato waajibaadkeeda Qaran.
2) Hay'addu waxay sanad kasta soo diyaarinaysaa qiyaasta miisaaniyad-sanadeedkeeda, waxayna u gudbinaysaa Wasaaradda Maaliyadda, Xukuumadda JFS si loo marsiiyo hab-raacyada miisaaniyadeed ee Dawladda.

3) Hay'addu waxay u madax-bannaan tahay maamulidda miisaaniyadda loo qoondeeyey si waafaqsan shuruucda maamulka maaliyadda guud ee Dawladda JFS.
4) Baaxadda hawlaha ay qabato, goobaha ay ka hawl-gasho iyo cadadka kharaashaadkeeda awgeed, Hay'addu waxay ku leedahay adeegyada ay bixiso khidmad ay isla jaan-gooyaan Wasaaradda Maaliyadda iyo Hay'addu oo ay u isticmaasho fududeynta qalabka, shaqadda iyo bixinta gunnooyinka shaqaalaha si waafaqsan nidaamyada iyo hanaanka Maaliyadeed ee xukuumadda DFS .

## Qodobka 27aad: Xisaabaadka iyo Hanti-dhawrka

1. Hay'addu waxay wada-shaqeyn la leedahay Hay'adaha dawladda ee u xilsaaran lasocodka iyo ilaalinta maaliyadda, sida Hanti-dhawrka Guud ee JFS oo leh awoodda baarista iyo dabo-galka hantida dadweynaha iyo sida loo adeegsaday.
2. Hay'addu waxay leedahay Hanti-dhwre u gaar ah (Internal audit) wuxuuna ka shaqeeyaa dhawrista hantida hay'adda iyo xaqiijinta u-hogaansanaanta sharciga.
3. Wuxuu ka gacan siiyaa Hanti-dhawraha Guud fududeynta gudasha waajibaadkiisa shaqo ee ku aaddan Hay'adda.

## Qodobka 28aad: Warbixin-sanadeedka Hay'adda

1. Hay'addu waxay dhammaadka sanad kasta (Bisha Deseembar) soo bandhigeysaa warbixinsanadeed ay ku caddeynayso waxqabadkeeda sanadka dhammaanaya waxayna u gudbinaysaa Wasiirka Wasaaradda Amniga.
2. Warbixinta Miisaaniyad sanadeedka ay heshay iyo sida loo adeegsaday iyo haddii ay jirto baahi kordhin miisaaniyadeed oo

lagu soo muujiyey qoraal sababeysan, waxa ay la wadaagaysaa Wasaaradda Maaliyadda.

3. Hay'addu waxa ay u madax-bannaan tahay maamulidda miisaaniyadda loo qoondeeyey si waafaqsan shuruucda maamulka maaliyadda guud ee Dawladda.

## CUTUBKA SHANAAD
## QODOBBO ISKU-DHAF AH

### Qodobka 29aad:
### Xeer-nidaamiyeyaasha Hay'adda

1. Xeer-nidaamiyaha lagu dhaqayo sharcigan waxaa soo diyaarinaya Agaasimaha Guud, ka dib soo-jeedinta Wasiirka waxaa ansixinaya Golaha Wasiirrada ee Xukuumadda JFS.
2. Agaasimaha Guud ee HSJS wuxuu soo saarayaa Hab-raacyo iyo Xeer-hoosaadyo lagu dardar-geliyo hawlaha ay u xilsaaran tahay Hay'addu, hadba waqtiga ay kula habboonaato.
3. Haddii ay dhacdo in iska-hor-imaad dhexmaro Xeer-nidaamiyahan iyo Xeer- nidaamiyeyaal hore u jiray, waxaa la raacayaa Xeer-nidaamiyahan dambe.

### Qodobka 30aad:
### Baabi'in

Xeer-nidaamiyahani wuxuu baabi'inayaa Xeeri kasta oo ka hor-imaanaya ama aan la socon karin oo la xirira arrimaha socdaalka iyo qeybta Hay'adda ka khuseysa Jinsiyadda.

## Qodobka 31aad:
## Dhaqan-gal

Xeer-nidaamiyahani wuxuu dhaqan-gelayaa markuu ansixiyo Golaha Wasiirrada, isla markaana uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS, laguna soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.